

Suugaanta Soomaalida

SUUGAANTA IYO QEYBEHEEDA

1.1: waa maxay suugaan?

Macnaha luqadeed ee erayga suugaan, waxaa ka mid ah;

- ✓ Cawska roobaystay oo qoyay geedaha ugu horeeya ee kaso baxa , naqa, doog, cosob, magool, suugaan.
- ✓ Layrta qabow ee kadanbeysa roobka da'a; yalanyalxo.
- ✓ Budada haruurka.

Qeexida cilmiyeed ee erayga suugaan, (literature) ama(أدب);

- ✓ Waa hadal xaalad ama falsami laxiiseeyo leh.

1.2: fan iyo suugaan

Waa maxay fan?

Erayga fan, (arts) ama (فن), wuxuu kulmiyaa dhamaan curinta iyo halabuurka dadka kaso maaxda ee kuso gudbinayo dareenkiisa iyo fariintiisa, sida erayada, sawirka, muusikada, qorida geedaha, ama dhagxaanta iwm. Halkaas waxaa kafarcamaya laamo kala duwan oo fanku u uqeybsamayo.

Maxaa ka dhexeeya fan iyo suugaan?

Suugaantu (literature) waa laan kamid ah fanka, oo ah fanka hadalka!

1.3: Qeybaha suugaanta

Suugaanta waxaa loo qeybiyaa labo qaybood: tix iyo tiraab. Tix waa hadal kasta oo leh dhacdo iyo qaafiyad. Tiraab waa hadal labadaas - qaafiyad iyo dhacdo - midna lahayn.

Tusaale1:

Tiraab: Nin is faanshay wuxuu la mid yahay ri isnuugtay.

Tix: Ri' isnuugtay meel uga ekaa, nin is ammaanaaya.

Tusaale2:

Tiraab: safiya xaajiyeey waan ku sugayaaye soo soco.

Tix: soo soco safiya xaajiyeey, wan ku sugayaaye.

Tusaale2:

Suugaanta Soomaalida

Tiraab; gabaryahay, sidii oo aad hugaygii tahay; ama aad geeri iga
baajineyso; amaba dunida gabdho kale laga waayay;
bal gardaradayda, maxaan kaaga samri la,aahay?

Tix: sidii aad go'aygii tihiyo macawistaan goostay

Ama godkii aakhiriyo, geeri iga baajin

Ama aan geyiga lagu ogeyn, gabadh kaloo joogta

Gardariyaa maxaan Hodan Cabdaay, kaaga go'I waayay.

Macnaha labada tusaale ee kastaa waa isku mid, laakiin habka macnaha
lagu sheegay ayaa kan hore tiraab yahay , kan danbane tix yahay.

Bal aan eegno sheekadii caanka ahayd ee “qayb libaax”.
Sheekadaan qof kastaa waxaa uu ku wariyaa erayadiisa ayadoo macnaha
iyo fariinta ay gudbineysaa isku mid yihiin.

Sheekadaan, abwaankii Xuseen Dhiqle waxaa uu ku sheegay tixdan:

1. Qayaashmaash libaax baa dhurwaa, qaybi yidhi soore.
2. Wuxuu yidhi “hilbaha jeex bal qabo, qoon dhan baan nahaye”.
3. Markaas buu qanbaabilihi qoonsadoo dayaye.
4. Dharbaaxuu il kaga qaaday oo hoorka soo qubaye.
5. Af-qashuushle goortuu dhintuu sii qataabsadaye.
6. Dawacuu markaas soo qabsaday sida qisaaseede.
7. Iyadoo qadh-qadhi buu ilkaha, qoor qabkii xogaye.
8. Wuxuu yidhi, “qanjaafula xumey, tali qadaarkaada”.
9. “adeer gacalle qaar iyo dalool, qowdho iyo feero
10. Qummud iyo baruur iyo lagiyo, qowlihii kuruska”.
11. Waxay tiri “islow qeybiyee, neefka wada qaado”
12. Markaasu dugaagii qabsaday, qoobab kadafleeye.
13. “isaguba qareen maleh dayoy, qayliyaha aare.
14. Innago quruun dhana maxaa, qado inoo diiday”
15. Waxay tiri: “qacdii hore haduu, cali kusii qaaday
16. Kii inoo qabweynaaba waa, qooq wax loo dilaye
17. Badh baa kuu qismo ah waa wuxuu, eeday qaar yare’ e
18. Anigoo qadaarkana miyaa, qamash kaso waaqsan?”
19. Qudheydaan u yaabaye miyaan idin qasaarteeyay?!
20. Anna qaabadii baan ahoo, lay qulqulateeye
21. Labadii qof ee igaga hadhay, qaafadii dumarka
22. Middii qurux urooneyd haday, cali la qooqeyso
23. Iska qaata naadaba rag bay, qaac u shidataaye.

Suugaanta Soomaalida

Maansadaani waa isla sheekadii qeyb libaaax oo tix ahaan la inoogu soo gudbiyay.

Tixdaan Xuseen Dhiqle markasta waxaa ku tebineynaa erayadii uu Xuseen Dhiqle ku adeegsaday. Markaanse, sheekada qayb libaax tiraab ahaan u sheegeyno qofka kasta erayadiisa asigaa xusha.

1.4: Astaamaha tixda

Astaamaha ay tixdu leedahay waa **dhacdo** iyo **qaafiyad**, waana latebiyaa. Dhacdadu (rhythm) (الابحاع) waxay suugaanta kadhigaysaa mid sargo'an oo leh hab-dhac muusiko, iyo luuqeyn. Dhacdadu waxay ka dhalataa miisaanka baydka oo la raacinayo khad jeexan oo aan laga duwi Karin; waxaana halkaa kadhalanaya “*badda*” ama “*godka*” ay tixdaasi ku socoto.

Qaafiyaddu (Alliteration) waa adeegsiga iyo soo celcelinta xarafka ay maansadu kusocoto, waxayna qayb ka tahay jaangoynta dhismaha tixda.

Munaasabadii calansaarka ee 1960kii, wuxuu Cabdullahi Suldaan “Timacadde” ka tiriyay maansadiisii “***kaana siib, kanna saar***” ee uu yiri :

Calankaanu sugaynayee

Sahankiisa ahaynoow;

Seermaweydo hilaacdayoow;

Sagal maanta darroorayoo

Siigadii naga maydhayoow

Saq dhexaanu aheyne

Kii soo saaray cadceedoow...

Markaad u kuur gasho maansadaan, waxaad arkaysaa iney leedahay dhacdo iyo miisaan u yeelaya muusiko iyo luuq isku mid ah oo kawada dhexeeya baydadka maansada, oo ah xarafka “s”. waxaana lama huraan ah in bayd kasta uu kujiro eray ka bilowda xarafka “s”; sida *sugaynayee, sahankiisa, seermaweydo, sagal...*

Tixdu, god kasta oo ay tahayba, waa in la ilaaliyaa dhacdadeeda iyo qaafiyada ay ku socoto. Hadii lajebiyana waa ceeb tixda u soo hoyatay, loona yaqaano “deel-qaaf”. Qofkii maansadiisa deel-qaaf lagu arko, waxaa loo qaadanayaa qof halaburnimada diriqsanaya, waxaan dhacda in abwaanada kale iyo dadweynuhuba ceeb iyo canaanba usoo jeediyaan.

Suugaanta Soomaalida

Tixda waxaa lagama maarmaan u ah “**tebinta**” ama “**verbatim**”, oo ah erayadii ay kuso aroortay in sidoodii loo xafido, laguna wariyo marka lasheegayo. Geeraarka “Timacadde” iyo maanso kastaba, waxaan kuso tabinaa erayadii abwaanku adeegsaday, ee uu maansada ku curiyay. Marba haday tix tahay tabinta waa lagu qasbanyay, oo eray kali ah lagama badali karo. Hadii laga badalana ma naqaneyso tixdii abwaankaasi curiyay

Suugaanta tiraabta ahi uma baahna dhacdo iyo qaafiyad midna; sida badan dhacdo iyo qaafiyad looma yeelo. Mararka qaarkood, waxaa la arkaa in halabuurku tiraabtiisa u adeegsado dhowr weerood oo isku sargo’an, oo u ekaanaya iney dhacdo wada yeelanayaan. Laakiin sida badan, taasi laba ama sedax weerood madhafto. Sidoo kale, suugaanta tiraabta ah waxaa lagu arkaa erayo isku xiga, oo qaafiyad kuwada socda. Qaafiyadda nuucaan ah, ee tiraabta kusoo aroorta, waxaa lagu magacaabaa “sajci”⁽¹⁾. Sajcigu malahan qaafiyad taxan min bilaw ilaa dhamaad waase erayo isku qaafiyad ah oo weer ama weero isku xiga kusoo arooray, kadibna erayo kale oo qaafiyad kale kusocda ayuu halabuurku ugudbaa. Guud ahaan, sajcigu tiraabta wuu qurxiyaa, haduu ku batose quruxdaasi way dhaawacantaa.

Dhinaca kale, tiraabtu uma baahna “tebin” waxaa kuflan “werin” kaliya. Tiraabta laguma qasbana erayadii ey kusoo aroortay in laxafido, amaba lagu sheego marka lagudbinaayo; waxaa loo baahanyahay kaliya in macnaha la xasuusnaado, lana wariyo, tusaale ahaan, waxaynu badiba dhegeysanay sheekooyinka soomaalida caanka ku ah, sida sheekada Dhegdheer ama Cigaal Shiidaad iwm. In kasta’oo sheekooyinkaasu isku mid yihiin, hadana qof kasta erayadiisa ayuu ku wariyaa; waxaa lawada ilaaliyaa dhacdooyinka sheekada iyo nuxurkeeda, laakiin erayada lagu warinayo qofna iskuma daaliyo xafididooda.

1.5: Qeybaha tixda

Tixda waxaa loo qeybiyaa labo qaybood oo waaweyn oo kala ah: maanso iyo heeso.

Maansadu waa tix latiriyay oo kaligeed la gudbiyo. Maansada waxaa kamid ah gabay, geeraar, jiipto iwm. (maanso = tix sooc ah)

Heesuhu waa tix la tiriyo iyada oo ay wax kale wehliyaan. Waxyaabaha heesta wehliya waxaa ay noqon karaan jiiib, jaan, sacab, or, muusik iwm. Heesaha waxaa loo qeybiyaa afar qeybood oo kala ah: hees howleed, hees caruureed, hees ciyaareed, iyo hees muusik. (heestu = tix + wax kale).

Suugaanta Soomaalida

(1)Erayga “sajci) waxaan kasoo amaahanay suugaanta af-carabiga.

Maansooyin

CAQLIGA WANAAGSAN

Maansadaan wxaa tiryay Xasan Sheikh Muumin. Abwaanku wuxuu tilmaamayaa qiimaha aqliga fiican, wuxuuna yiri:

Goronyadu ilmaheeda,

Aroori bay dhigtaayoo

Aboodigu ku laayaa,

Shimbirtuna aroosay

Ilaxidhoo amaana bay

Ubadkeeda seexisaa.

Kala awran labuduye

Edebtiyo aqoontiyo

Asluubtay isku dhaafeen,

Aqligii wanaagsani

Itaal inuu ka roonyahay

Bal eegoo u fiirsada.

Kala awran labaduye

Edebtiyo aqoontiyo

Asluubtay isku dhaafeen,

Aqligii wanaagsani

Itaal inuu ka roonyahay

Bal eegoo u fiirsada

Ma ogtahay sagaaraadu

Awaarahay qoddaayoo

Saaladeeda ku aastaa,

Libaaxuna ma asturee

Hilimmaduu ku arooruu

Digadiisa ku aslaa

Suugaanta Soomaalida

ALLAHAYOW NIN II DARAAN

Ugaas Nuur Ugaas Rooble Wuxuu ahaa hogaamiye magac weyn ku leh deegaanka Boorame Iyo Seylac, Wuxuuna dhulkaa ka arimin jiray ka hor intaan gumeysigu dhulka soomaaliyeed qabsan. Tixdaan wuxuu ugaasku ku sheegayaa garashadiisa diblamaasiyadeed ee uu dadka ey is hayaan kula dhaqmi jiray wuxuuna yidhi:

Allahayow nin ii daran maxaan,	daafta hore seexshay
Nin ii daaqsanaaya maxaan,	daafidow kariyay
Jidhku nimaanu dooneyn maxaan,	hadalka deeqsiyay
Ma degdego e xaajada maxaan,	uga dulqaad yeeshay
Waji dabacsan daymo aan dareen,	gelin dubaaqiisa
Debna furan dabuub una ka didin,	deexashiyo muuso
Qosol debadda yaaloon ka iman,	dhuunta dacalkeeda
Kanaan degay kanaan doorka biday,	kani dan baan mooday
Waxaan dood kaftan ah sheekada,	uga daleeyaaba
Dabinkaan u dhigay maalintuu,	degelka soo saaro
Intiyoon dawaarka u rogoon,	xeeladda u daadsho

Suugaanta Soomaalida

Isagoon dareen qabin maxaan,

kaga dayaan siiyay

QOLO MASHEEGTEENE

Gabaygaan waxaa tiriyay Abwaan Abshir Nuur Faarax (Bacadle) sanadkii 1992. Wuxuuna abwaanku faaleynayaa xumaanta qabyaaldda. Gabayga oo aan halkaan ku dhameyn, abwaanku wuxuu yiri:

Quruun waliba cudur qaas ahoo,

qeybiyaa jira e

Soomaali bela loo qoraye,

qalinka loo saaray

Wax qabiiln ka daran jahannamaan,

qiray aqoonteyda

Qadartaana iga hiilisaye,

qolo ma sheegteene

Qof waliba la' qabyaalad iyo diin,

qaadi kari waaye

Uma qeybsamee meel unbuu,

qac uga siiyaaye

Ma'anaa qur'aankiyo kataga,

qowlki nabigeenna?

Qabrigayga ma'anaa qotoo,

qubaya diinteyda?

Qatli muumin ma'anaa hub iyo,

qarash ku taageera?

Ma'anaa qabiil door bidoo,

qaranka aafeyay?

Waa quud ka dhigo ruux muslim ah,

hilibki qeyriine

Ilaahow adigu heygu qaban,

qaadir baad tahaye.

WAX YEELADA QAADKA

Dhibaataada iyo waxyeelada uu qaadku leeyahay waxaa ka hadlay abwaano badan oo uu ka mid yahay Xaaji Aadan Axmed Afqalooc, wuxuuna yidhi:

1- Qaadkii allahayow muxuu,

qarax inoo keenay

2- Qabsinnadii muxuu owdayoo ,

xididadii qoomay

3- Maxaa doobab qaro weyn lahaa,

qalin ka dhuubnaaday

4- Qaan gaadh midaan noqon muxuu,

qaaxu ku abuuray

5- Maxaa baarqab qaalmihii ku jira,

qooqi kari waayay

6- Maxaa naag ninkii qabay furoo,

qeydo dhaaf noqotay

7- Maxaa qani adduun badan lahaa,

inan qasaareeyay

8- Muxuu shaqo qabyo aheyd ninkii,

qaban lahaa seegay

9- Maxaa habar caruurtii qubtoo,

oday qasiisobay

10- Maxaa qaawaniyo tuug bartoo,

suufi waran qaatay

Suugaanta Soomaalida

11-	Maxaa qoys isku hoggaansanaa,	qoloba meel aaday
12-	Maxaa duul dhan oo wada qayila,	qaan ka bixi waayay
13-	Muxuu inan qarsoonaan jirtay,	gaari qumayeeyay
14-	Muxuu maal qiyaas li'I ku lumay,	qaatay cadawgeenu
15-	Maxaa qaar mirqaan ka hadliyo,	qalad ku faalowday
16-	Muxuu ruux ayaan qudha ka hadhay,	kaadidii qabatay
17-	Maxaa geel jir tuula u qabtoo,	qaanki ka halaabay
18-	Maxaa gowsihii miduu ka qubay,	qori ku mooyeeyay
19-	Aniga iyo qeyrkey muxuu,	qoomama u geysatay?

HOOYOORY LA'AANTAA

Maansadaan oo tilmaameysa qiimaha hooyada iyo halka ay kaga jirto mujtamaca, waxaa tiriyay abwaanka caanka ah ee Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) wuxuuna yiri:

Hooyooy la'aantaa	Ka habaabi maaye	Gurigiisa habaqluhu
Adduunyadu hubaashii	Hooyooy addoomuhu	isku soo haleeyoo
Habeen kama baxdeenoo	Halkey manta joogaan	hayintiisa quudhoo
Iftiin lama heleenoo	Adigow horseedee	Hor ilahey geystiyo
Dadku uma hayaameen	Intaad hanad ximbaarte	Lama hure dhashaabaa
Dayax heega joogoo	haaneedka siisee	Hooyo lagu xasuustaa
Sida haad ma fuuleen	Horaadada jaqsiisee	Marka aad nin himilada
Xiddig hawada lulatoo	Habtay baan xisaab iyo	Hilin toosan mariyoo
Hawo laguma gaareen	Tiro lagu heleynoo!	Siideyn hogaankoo
Hubka laguma tureen	Marka aad nin hanadoo	Howlaha qorsheeyoo
Circa hirar ka muuqdo	Laga baqo hashiisiyo	Hir markii lagaadhaba
	Halyey diiran	

Suugaanta Soomaalida

Marka aad nin hooggiydshu halacsaneysaa		Hayin lagu badhaadhaay
Ka hortaga dagaalkoo	Hablahaaga weeyoo	Hogol lagu qaboobaay
Debka hura baqtiyoo	Marka guur lahaybshee	Gogol lama huraaneey
Garta hubin yaqaanoo	Gabadh heega dheeroo	Dugsi lagu hirtaayeey
Xaqa hoos u eegoo	Hoobaan lamoodoo	Hido lagu arooraay!
Halistiyo colaadaha	Karti iyo hubqaad loo	Intaad hooyo nooshahay
Ku hagoonsta dhiigoo	Quruxdane ka hodonoo	Hambalyiyo salaanbaan
Dadka kala hagaajoo	Hufan laga aroosaa	Hanta kaaga dhigayaa
Kala hage dhashaabaa	Hooyo lagu xasuustaa	Habrashiyo xaq
Hooyo lagu xasuustaa	Hooyooy la'aantaa	dhowrbaan
Marka aad hoobal caano	Higaad lama bartenoo	Dusha kaa huwinayaa
Sacabka iyo heelada	Hadal lama kareenoo	Hooyooy
Labadaba hanaanshiyo	Ruuxaanad hābīnōo	dhimashadaaduna
Hindisaha farshaxanoo	Kolba aanad hees iyo	Hooggeyga weeyoo
Udall		Waligey hoggaagaan

Suugaanta Soomaalida

KAANA SIIB, KANNA SAAR

Maansadaan waxaa curiyay abwaan Cabdullaahi Suldaan (Timacadde) habeenkii calan saarka 26/06/1960, waa markii ugu horreysay ee calan soomaaliyeed oo xor ahi uu hawada ka babado, maansada oo aan halkaan ku dhameyn waxaa ka mid ahaa:

	Maalintaad kala soocdo	Calankey sahadshenow
Anigoo sabi uun ahoo	Dambigaanu sameynay	Cidina kaaney na siinine
Sita leeb iyo qaanso oo	Rabbigayow naga	Saatir noogu yaboohayow
Siigadoon isku aasiyoo	saamax!	Saaxirkii kala guurraye
Sabo reer ka fogaaninoo	***	Sarreeyow
La'ii aaminin soofkiyo	Subciyayoo ka dukeeyaye	manusqaamow
Saacan manta an joogno	Ka siddeetan sabaan	Aan siduu yahay eegno'e
Gabeygu weygu	Calankaanu sugaynayee	Kaana siib, kannaa saar!
sugnaaye	Sahankiisa aheynayow	***
Haddii aan sarsarriigo	Seermaweydo	Salaankii istiqlaalkow
Ama aan sarmoseejo	hilaacdayow	Sadadu key ku
Ama aan ka salguuro	Sagal maanta	xidhneydow
Amaba laygu saluugo	daroorayow ~	Sayruukhii afrikaadow
Soomaalida I maqlaysaay	Siigadii naga meydhayow	Saaxirkii kala guurraye
	Sagdhaxaanu ahaynayoo	

Suugaanta Soomaalida

Aan siduu yahay eegno'e Saaxirkii kala guuraye
Kaana siib, kanna saar! Sarreeyow
*** manusqaamow
Soomaaloo iscuneysa oo Aan siduu yahay eegno'e
Kaana siib, kanna saar!
Saqda qeylo ***
dhawaaqdiyo
Sulub laysu cebbeystiyo Nimankii na siraayaye
Hadba soof la Waaxwaax nook ala
xabbaadhiyo saaftaye
Saraayaa demi weyday Solanaaya cadkeyna e
Kii laydhiisu na saaqday Innagoo dhexda suunku
Kii sadqeeyay qabaa'il Sabarkeena qarqooray
Isku saaray gacmaa'e Kii sadkeena cunaayaye
Saf walaala ka yeelayow Sarartiisa ka muuqdaye
Saaxirkii kala guuraye Surwaalkii ka yaraadaye

Sowjarkaa hubka qaataye
Intuu soodhka ku taagi
U diyaara salaantiyo
Saraakiisha amreysaay
Sifihii isticmaarka
Ka siyaadiya maanta oo
Sibilkiinnan ag joogow
Sibirtiisa istaagoo
Nin walbow sigib-beeloo
Sarow taaga gacmaa oo
Sacabka isku garaaca oo
Nin walbaan sedex goor
Subxaanow waa
mahaddaa dheh

Suugaanta Soomaalida

II GUNUDDAY CAASHAQE

Heestaan waxaa tiriyay Axmed Saleemaan Bidde, waxuuna kaga hadlayaa gabar uu jeclaa ee uu kusifeeyay geed, gammaan, goray, iyo haro hiyo ah iney la mid tahay, wuxuuna yiri:

Sida geed caleenloo	Uu haro galduur miray	Oo gadafka baalkiyo Gilgilaaya waaxyaha Oo gudub talaabada Miyir u gundhinaayoo Xarrago u guraaya Ama galacda eegmada Indhahaaga goodka ah Gabar yahay kalgacal baad Goortaan ku eegaba Qalbiga ee gelisaa Waxes aanan garaneyn Ii gunuday caashaq Halka aad I gaarsiin ***
Ubax guudka qariyeen	Soddon bil iyo gawdeed	
Oy gooni laamaha	Uu goobay farawgii	
Ey midiba geesteed	Sararta iyo geedada,	
Hoobaan isgaadhiyo	Oo galangalcoodoo	
Guntin midha ah leedahay	Cududduhu gammuurmeen	
Oo soo gandoodoo	Oo galabba loo raro	
Galka faraqa soo daray	Sida ramad gu'yaal dhalay	
Oo gudan barwaaqo ah,		
Durdur aan go'eyniyo	Hadba kaynta geeda leh, ~ 12 ~	Sida gubanka qaarkii Dhul gargoorku siman yahay Ama maadh galdhiidhoo Guban iyo ku taal howd.
Gacan wabi kuyaala	Oon guluf colaad iyo	
Oo gu' iyo jiilaal	Wali wali socoto dhaanadiin	

Suugaanta Soomaalida

QORIDDA BEYDADKA MAANSADA

Baydadka ama meerisyada maansadu waxa ey kala yihiin kuwa ka kooban hal lug, laba lugood, ama sedax lugood. Labada lugood ee baydka waxaa u dhaxeeya nasasho (*Caesura*) marka tixda lagu luuqeynayo, nasashadaasi dhawaaqa qofka ayey ka muuqaneysaa, oo hakad neefta ah ayaa dhawaaqa qofka gelaya, hadduu beydku qoraal yahay nasashada waxaa lagu muujinayaa oo ka adeegsanayaa calaamadda hakadka (,) oo labada lugood u dhaxeeyneysa, oo halkii nasashada gelaya. Waa layeeli karaa, in masaafu banaan ah (tab) lagu bedelo; amaba labada lugood lagu kala qoro laba sadar oo isa sudhan, iyadoo lugta dambe laga bilaabaayo sadarka dhexdiisa, habkaan dambe, waxaa aalaaba la adeegsadaa marka balaca warqaddu cidhiidhi ku noqonaayo; sida, marka ardadu maansada ku qorayaan buugaagtooda layliska. Waxaa, marwalba, reeban in hal lug loo qeybiyo laba sadar.

Baydadka halka lug ah mar walba waa iney hal sadar ku qoranyihiin, sidaan:

Ma'ogtahay sagaaradu

Awaarahey qodaayoo

Saaladeeda ku aastaa

Suugaanta Soomaalida

Libaaxuna ma asturee

Hilimaduu ku arooruu

Digadiisa ku aslaa.

Baydaka labada lug ah, waxaa loo qori karaa seddax hab, oo kala ah, masaafu (Tab), amaba laba sadar oo isa sudhan, habka hadalku waa sidaan:

Qaadkii allahayow muxuu, qarax inoo keenay

Qabsimadii muxuu owdayoo, xididadii qoomay

Maxaa doobab qaro weyn lahaa, qalin ka dhuubnaaday

Habka masaafadu (Tab), oo hakad la raacin karo, lagana tegi karo waa sidaan:

Qaadkii allahayow muxuu, qarax inoo keenay

Qabsimadii muxuu owdayoo, xididadii qoomay

Maxaa doobab qaro weyn lahaa, qalin ka dhuubnaaday

Habka labada sadar ee isa sudhan waa sidaan:

Qaadkii allahayow muxuu

qarax inoo keenay

Qabsimadii muxuu owdayoo

xididadii qoomay

Maxaa doobab qaro weyn lahaa

qalin ka dhuubnaaday

qaagaadh midaan noqon muxuu

qaaxo ku abuuray

Baydka seddaxda lugood, waxaa loo qoraa labadaan hab midkood:

1) Geedba geedka u dheer, laga garaacyey

Galool mudhay mullaaxdiiyey

Koronkor cuni maynoo, kariba maynee

Karuur geel mala hayaayey

2) Geedba geedka u dheer, laga garaacyay. Galool mudhay mullaaxdiiyey.

Suugaanta Soomaalida

Koronkor cuni maynoo, kariba maynee, karuur geel mala hayaayey

DHISMAHA TIXDA

Tixda soomaaliyeed waxay leedahay habdhismeed hanaqaaday, oo halabuurku ilaaliyo marka uu tix curinaayo. Tiirarka habdhismeedkaas waxaa kamida:

- 1) Qaafiyad
- 2) 2) miisaan → godka maansada
 - a. Tirada shaqalada baydka
 - b. Tirada allan ee baydka iyo inta shaqal dheeree kujirta
 - c. Habka taxnaanta allanada
- 3) Waaxaha tixda: arar, duluc, dhextaal iyo gunaanad.

Tiiraarkaan dhismaha maansada, mid walba waan sii faah faahi doonaa.

Qaadiyadda tixda

1) Qaafiyadda

Qaafiyaddu waxay ka mid tahay tiirarka dhismaha tixda soomaaliyeed. tixdu waxay ka koobantahay baydad isku qaafiyad ah, sida ay isku dhacdooba u yihiin. Mararka qaarkood maansada waxaa loogu yeeraa qaafiyadeeda, waxaa layiraa maansadii miinleyda ahayd ee uu abwaan hebel curiyay. Silsiladaha qaarkoodna waxaaba magac u noqday qaafiyadda ay kusocotay, sida silsiladii siinleey, silsiladii deeleeey iwm. Qaafiyaddu ama (alliteration) waa adeegsiga iyo soo celcelinta xaraf isku mid ah. Bayd kasta oo maansadu ka koobantahay waa inuu ku jiray eray ama kabadan, kabilawda xaraf qaafiyadeedka ay maansadu kusocoto. Godadka ama badaha kala duawan ee maansadu way ku kala duwan yihiin tirada erayada xanbaarsan xaraf qaafiyadeedka, ee ay tahay iney beyd kasta ku soo noqnoqdaan. Xarfaha qaafiyadda ee soomaaligu waa 22 xaraf, 21 shibane ee lawada yaqaano, iyo shaqallada oo loola dhaqmo sidii xaraf-qaafiyadeed kaliya, waxaana lagu magacaaba xarafka hamzada²

Tirada erayada xarafqaafiyadeedka ee bayd kasta waxaa ay xiriir la leedahay tirada lugaha ee baydka ka koobanyahay. Halkii lug ee baydka ka mid ahba waxaa gelaya ugu yaraan hal xarafqaafiyadeed. Wy furantahay in hal xarafqaafiyadeed ka badani ey lugta galaan. sidaa darteed, baydka halka lug ka kooban, sida kan geeraarka iyo jiiftada, waxaana gelaya ugu yaraan hal xarafqaafiyadeed; baydka labada lugood ka kooban sida gabayga iyo buraamburka waxaa gelaya ugu yaraan laba xaraf qaafiyadeed, oo labada lugood ku kala jira;

Suugaanta Soomaalida

baydka seddaxda lugood ka kooban, sida heesata kabadda, waxaa gelaya ugu yaraan sedax xaraf qaafiyadeed, oo seddaxda lugood ku kala jira.

Waa la ilaaliyaa xaraf qaafiyadeedka tixda, waxaan laga dhowraa laaxin gala. Jebinta qaafiyaddu waa gef hal-abuurku galay, waana ceeb u soo hoyatay maansada, waxaana loo yaqaan “deelqaaf”³.

Geeraarka “Kaana siib, Kanna saar” ee Cabdullaahi Suldaan Timacadde qaafiyaddiisu waa xarafka “s” tusaala ahaan:

*Calankaanu sugeynaye
Shankiisa aheynow
Seermaweydo hillaacdayow
Sagal maanta daroorayow
Siigadii naga maydhayow
Saqdhaxaanu ahayne
Kii soo saaray cadceedow...*

1. Cilmi baarayaasha falanqeeya suugaanta soomaalida qaarkood waxay door bidaan adeegsiga erayga “higaad” halkii laga adeegsan lahaa “Qaafiyad” waayoo, “qaafiyad” waa eray asal ahaan loo adeegsado xarafka ay kalmaddu ku dhamaado, ee luqadaha qaarkood ku dhisaan maansadooda sida carabiga, hadalka higaadu ina tuseyso xarafka uu eraygu ka bilaawdo, waxaan qoraalkaan door bidnay erayga qaafiyad, maadaama uu adeegsigiisu da’ahaan iyo tira ahaanba suugaanta soomaalida ku badan yahay.
2. Cilmi-afeedku wuxuu tilmaamayaa in eray kasta oo shaqal ka bilawdaba uu xarafka hamzadu ka horreydo, laakiin af-soomaliga hamzada bilowga gasha lama qoro.
3. Abwaan cali-dhuux aadan oo deelqaafka tilmaamaya wuxuu yidhi:
*Afartaa sidii dalab la ridey, maysu daba joojey?
Da’daan kaga bilaabiyo miyaan, dowgii ka haleeya?
Ma daleeyay deelqaafku waa, kaa dilaa gabaye?*

Gabaygii “Dardaaran” ee Sayid Maxamed Cabdulle Xasan qaafiyaddiisu waxay ku socota xarafka “d”, waxaana kamid ahaa sadaxdaan bay doo aan xarafkii qaafiyadda hoosta ka xariiqnay :

<u>D</u> angaraaradii nagu dhacdiyo,	wabi <u>d</u> abaashiisa
In kastoo <u>d</u> aleel nala dhigaan,	<u>d</u> oocna lagu cayman
<u>D</u> uufllaalladii nagu hadhow,	<u>d</u> an iyo xeeshiina

Suugaanta Soomaalida

Buraanburkaan oo ay tirisay hooyo Xaliimio Muxumed,
qaafiyaddiisu waa “d”:

Dadkuna wuu kuu dudaa, Deeqa xaajiyeey
Daleysey hooyo anna, waan ku daawadaa
Baydka heesta kebedda ah qaafiyadiisu waa “g”
Geedba geedka u dheer, laga garaacyey,
 galool mudhay mullaxdiiyey

Maansadii Shan Ubaxley ee Hadraawi Qaafiyaddeedu waa
hamsada, oo shanta shaqal metalayaan. U firso baydkaan kamid ah:

Ubaxley shan ubaxley
Magacaagu waa ubo
Gacmahaagu eegmada
Waa laba uloodoo
Enefdhii ku yaalloo
Unuunkaagu waa Xamar
Adhaxdaadu waa Herer
Addimada Hargeysiyo
Obokh bay ku beermeen
Abtirsiimadiisuna
Afrikoo dhan weeyaan.

Mararka qaar tirada xaraf qaafiyadeedka ku jira baydka wuu ka
bataa tiradii daruuriga ahayd, oo lugtiiba waxaa ku soo aroora hal xaraf
qaafiyadeed ka badan, sidan:

Qof **q**albigii **q**abyaalad iyo diin, **q**aadi kari waaye

Jacbur

Jacburku waa nooc ka mida maansada, waa tix la tiriyo qaafiyad la’aan,
kuse socota dhacdo iyo miisaan isku mid ah. Jacburka bayd kasta wuxuu
noqon karaa qaafiyad gaara. Sida badan jacburka waxaa loo tiriya
madadaalo iyo qosol, xikmadna kama marna. Hal-abuurada soomaaliyeed
ee jacburka ku can baxay waxaa kamid ah Cabdullaahi Macalin
Dhoodaan.

Suugaanta Soomaalida

Jacburka qosolka iyo madadaalada iyo kobcinta khayaalka ee dhoodaan waxaa kamid ah:

Hal baa timid, wanbaa guursadoo,	qaadi bow mehershay
Lax baa oontay, geel bey cuntayoo,	rooti bay karisay
Walaa orday, jeerbaa herdiday,	gaadhi bay noqotay
Bur baan shiilay, fuud buu noqdayoo,	dherigi baan waayay
Maraa oloshay, ceel baan ku riday,	shaadhadh bay noqoty
Col baa duulay, reerbuu martiyay,	nayl yar baa didisay
Rah baa faanay, jiir qaylyayuu,	guudka kaga booday
Hawaa kibirtay, ruux baa dibiro,	caashaq la ilmeeyay
Balaa roortay, baas baa eryaday,	saa jinnay qabatay
Dab baa seexday, dhagax baa qayilay,	kabina waw heesay
Faalkii la dhigay, maalinuu,	turubka baandheeyay
Mingiskii riyoodaa na yiri,	wuxuba waa beene

Isagoo gabadh amaanya wuxuu jacbur ku yidhi:

Geesiyad wey tahay illayn,	sharaftu waa saase
Ma cabsooto oo hooyadeed,	wey la dirirtaaye
Caydiyo dagaalkana gabdhaha,	way ka badisaaye
Ninkii la hadlana waa lagu yaqaan,	inay dacweysaaye
Sida kaneecadey uga baqaan,	derisyadoodiiye
Reeraha aashuunkooda wey,	jebin taqaanaaye
Qofkii maaga iyo naagahay,	timaha jiidaaye.

Jacburka qaarkiis waxa uu ka hadlayaa arima nolosha dadka toos u taabanaya, isla markaana kama marna qaab qosol iyo dheeraad ah wata. Dhoodaan mar uu afrikaanka shaqo iyo horumar uu ku waaniyay, wuxuu jacbur ku yiri:

Dhulkiise lagaba guuryoo xidigahaa,	loo tartamayaaye
Xidigaha dushoodaa haddaba,	laysku haystaaye

Suugaanta Soomaalida

Aboolayaashu waa wixii qaribay,

dunida fiicnayde

...

Haddaynaa inana boodin oo,

meel kasii dayanin

Afrikaanu baashuu lahaa,

waa la degayaaye

Nin seexdaa siciis dibi dhalyoo,

horeba loo sheegye

Orgi fuulayaa iyo qabaal,

miig ka dhiganaaba

Todobaadkaan waa inaan haddaba,

samada aadnaaye.

Jacburka dheer ee isa sudhan, ee uu tiriyay hadraawi, waa maanso siyaasadeed qosol iyo xikmadaba leh oo abwaanku ku soo bandhigayo kacdoonkii reer filibiin ee ka dhan ahaa ferdinando maarkoos. Abwaanku wuxuu curiyaay muuqaalo sawirayo kacdoonkaas iyo wixii dhex maray dad weynaha iyo madax weynaha kali taliska ah. Abwaanku wuxuu muuqaal kasta daba dhigayaa casharo uu u tebinayo bulshada, si uu wacyigeeda siyaasadeed ee ku aadan kali taliska iyo diktaatorinimada uu kor ugu qaado. Jacburku waa sheeko masraxeed sifaynaysa kacdoon dadweyne oo ku kacay mudane Ferdinand Marcos (1917-1989) oo ahaa madaxweynaha filibiin ee mudadii (1965-1986) waxaa kacdoonka hor socday Carazon Aquino oo saygeedii uu dilay madaxweyne Markoos. Qiimaha jacburkaan waxaa xoojinaya xilligii uu soo baxay oo ahayd sideetamaadkii qarnigii labaatanaad ee tegay. Xilligaas waxaa soomaaliya ka dhisnaa nidaam kali talis ah, waxayna la karkaraysay dhibaatooyinka kali taliska ka dhasha.

Jacburkaan oo dheeraa waxaa ka mid ahaa:

Isagoo galgalad kale
Dadka gooni ula shira
Wuxuu yidhi gudoonshu:
“qarafsiga aroortii
Qadhaab doonashada guu
Qofna looma diidee
Haddii quwaac helo
Dadka kalena wada qado
Maxaa lay qaleeyaa?
Ma wax baan qaloocshoo
Qarankiyo dalkaan dhacay?
Ma wax qiiri kiciyoo
Laga qoomamoodaa?...
Dhulku lacag maheystee
Shilimada ka soo baxa
Qof haddaan la wada siin
Qiyaashmaash-ka ugu wayn
Miyay qaybsameysaa?
Haddii laysku wada dilo
Hadhow yaa mas’uul ka ah?
Haddii herito lay rido

Ma waxaydin jeceshihiin
Inaan daasad qaatoo
Ceebeeya filibiin
Intii ay dhul weynaha
Raggii dhoofay heysteen
Sida owr dhufaanaa
Usha laygu dhaqayee
Labadeyda dhabanbaan
Mid markay dharbaaxdaan
Ka labaad u dhigayoo
Intaas waan dhursugaye
Inta dhiisha qabada ah
Wuxuun iigu dhacayaan
Idina maa I dhowrtaan
Wixii roobku di’I jiray
Wuxuu doog jilbaha dhigay
Diihaal ma laqanyoon
~ 19 ~ Dibnahaa qalalan wali
Duqu wuxuu ka marag kacay
Danni horeba loo qabay
In dooraad gumeystuhu
Dusha sare ka raran iiray

Suugaanta Soomaalida

Markaad u fiirsato jacburadaan aan tusaalaha usoo qaadanay, waxaa kuu soo baxaya in:

- 1) Jacburku uu leeyahay dhacdo iyo miisaan go'an ay tixdu ku wada socoto,
- 2) Jacburku aanu lahayn xaraf qaafiyadeedkii jaan gooyada u ahaa tix kasta.
- 3) Labada tusaale ooh ore waxaa loogu talo galay madadaalo iyo qosol, iyo dhisida qiyaalka.
- 4) Labada tusaale ee danbe waxay leeyihiin duluc kahadlaysa nolosha dhabta ah, waxaase loo dhigay qaad qosol iyo madadaalo huwan.

Miisaanka Tixda

Tixdu waxay ka koobantaa baydad isku dhacdo ah, sida ay isku qaafiyadba u yihiin. Dhacdadu waxay kamid tahay tiirarka gun dhigga u ah dhismaha tixda. Dhacdadu (rhythm) (الأيفاع) waa tixda oo la raacinayo hab dhac sar go'an oo aan laga duwi Karin "versification", waxayna ka dhigaysaa mid leh hab dhac muusiko, iyo luuq isku mid ah. Miisaanka tixdu wuxuu qeexayaa xeerarka ay dhacdadu ku socoto. Waxaana halkaa ka dhalanaya "god" ama "bad"¹ ay tixdaasu ku socoto. Baydadka tixda soomaalida waxaa ka mid ah gabayga, geeraarka, jiiiftada, buraanburka iyo kuwa kale. Tix kastaba waa in la ilaaliyaa dhacdadeeda ama miisaankeeda, hadii lajebiyana waa dhaliil tixda u soo hoyatay waxaa loo yaqaanaa qeelqaaf ama laaxin.

Miisaanka tixda soomaalida waxaa cilmi ahaan u daahfuray todobaatanaadkii qarniga 20aad labada cilmi bare ee kala ah prof. Cabdullaahi Diiriye Guuleed Caraale iyo Abwaan Maxamed xaashi Dhamac "Gaariye"². Labadaan cilmi bare waxay soo gudbiyeen qoraalo si cilmi ah u soo bandhigaya miisaanka tixda soomaalida. Gaariye wuxuu maqaalo taxane ah oo miisaanka maansada ka hadlaya ku

Suugaanta Soomaalida

faafiyay wargayskii xiddigta oktoobar billawgii 1976kii. Waa qoraal lafaafiyo oo miisaanka maansada ka hadlaya kii ugu horeeyay. Prof. Caraale wuxu isagu qoray buugga “Gorfaynta gabayga” billwgii 1976kii, iyo buugga kale ee “Miisaaanka maansada soomaaliyeed” sanadkii 1977. Labadaan buugba si cilmiyaysan oo qoto dheer ayey arrintaan uga hadleen. Labadaan buugba waxaa iibsaday jaamacadda ummadda soomaaliyeed, xilligaasna lama faafin³.

Miisaanka tixda soomaalida waxa uu ku socdaa (1) tirada shaqalada baydka; (2) tirada alan ee baydka iyo inta shaqaldheer ee ku jirta ; iyo (3) habka taxnaanta alanada ee baydka gudahiisa. Miisaanka tixda soomaalida waxaa laf dhabar u ah sedaxdaas oo wada jira; waxa ayna unkaan waxa loo yaqaan godka ama badda tixda.

Maxaan alan ula jeednaa?

Hadalka wuxuu ka koobmaa erayo loo taxay si waafaqsan xeerarka luqada lagu hadlayo. Eraygu wuxuu ka koobmaa xubno dhawaaqeed yar yar, oo loo yaqaan “syllable” ama “مقطع” oo lagu soomaaliyeeyay alan.⁴. sameysanka alanka waxaa xudun u ah shaqal, ha dheeraado ama ha gaabnaado, waxaana raaci kara ha lama labo shibane. Alanka ka unkuma shaqal gaaban waxaa lagu magacaabaa alan shaqal gaab; kan ka unkama shaqal dheerna waxaa loo yaqaanaa alan shaqal dheer.

-
1. Labada eray ee god iyo badba waa la adeegsaday malaha bad waxaa laga soo dheegtay afka carabiga (بحر) loo adeegsado macnahaan god ama bad maanso. Halka god laga soo qaatay godkii shxda iwm, oo halabuurada qaarkood inta ay shaxda ciyaarayaan ay gabayo isku dhaafsan jireen, marka uu dhawr bayd tuurana yiraahdo “god kanaan degay”. Labada erayba macnaha looga gol leeyahay way gudan karaan, qoraal keenaanse erayga god ayaan ku adeegsanay.
 2. Guud ahaanba xeerarka dhismaha maansadu way soo jireen, halabuurada soomaaliyeed iyo dadweynuhuba garasho way u lahaayeen, wayna u kala cadayd maansada teeda saxan iyo teeda jaban ama deelqaafka ah. Labadaan aqoonyahan waxay sameeyen waa inay xeerarkaa soo dharaandhiriyaan oo qeexaan. Waa sida hadalku ugu socdo luqada lagu hadlayo, dadka ay afka hooyo u tahayna ay sifican ugu hadlaan, mar danbena la qeexo xeerarka naxwe ee luqadaas.
 3. Qiyaastii rubuc qarni kadib ayuu Prof. Caraale daabacay buugga “miisaanka maansada soomaaliyeed” oo labadaas qoraal ay lafdhabar u yihiin.
 4. Qoraallada afsoomaaliga ku qoran erayga “syllable” ama “مقطع” waxay u adeegsadeen alan, higgaa, ama xubin. Halkaan waxaan ku adeegsanay alan.

Miisaanka tixda soomaalidu, wuu is garabwadaa alanka iyo shaqallada, midkoodna lagama maarmo; oo shaqalada iyo alamaduba, tiro iyo nuucba, kaalin mug leh ayey ka qaataan sargoynta baydka.

Suugaanta Soomaalida

Sidaas darteed, miisaanka tixda afsoomaaligu waa hal alan-shaqalle (moro-syllable) ah.

U fiirso dhawrkaan bayd:

Dangaraaradii nagu dhacdiyo,	wabi dabaashiisa
In kastoo daleel nala dhigaan, cayman	doocna nagu
Duuflaalladii naga hadhow,	dan iyo xeeshiina

Marka aan muujino alameda baydadkaan, innagoo alameda eraygu ka kooban yahay ku kala soocanyana jiitinta(/), waxaa ay noqonayaan sidaan

Dan/ga/raa/ra/dii na/gu dhac/di/yo, da/baa/shii/sa	we/bi
In/ kas/too da/leel na/la dhi/gaan, cay/man	dooc/na na/gu
Duuf/laal/la/dii na/ga ha/dhow, xee/shiin/na	dan i/yo

God kasta ee tixdu waxaa uu leeyahay tiro shaqalo ah ee uu ka unkamo. Marka latirinayo tirada shaqala bayd kasta, shaqalka gaaban waxaa loo tiriyaal hal, shaqalka dheerna labo. Haddii aan tirino tirada shaqallada baydadkaan waxay noqonaysaa sida tan

Dan/ga/raa/ra/dii na/gu dhac/di/yo, da/baa/shii/sa	we/bi
1 1 2 1 2 1 1 1 1 1 2 1 (20)	1 1 1 2
In/ kas/too da/leel na/la dhi/gaan, cay/man	dooc/na na/gu
1 1 2 1 2 1 1 1 2 1 1 1 1 (20)	2 1
Duuf/laal/la/dii na/ga ha/dhow, xee/shiin/na	dan i/yo
2 2 1 2 1 1 1 1 2 2 1 (20)	1 1 1

Suugaanta Soomaalida

Labada xaraf ee “w” iyo “y” waa shaqal-ka-warqab (semi vowels) (انصاف الحركات) waxayna leeyihiin laba hab dhaqan; mar waxay u dhaqmaan sida shimbanaa, oo markaa tirada shaqalada baydka ma soo gelayaan; marna waxay u dhaqmaan sida shaqalka, oo tirada shaqallada ayaa lagu derayaa. Y-da iyo W-da kujira alanka (cay) ee baydka labaad, iyo alanka (dhow) ee baydka sedaxaad, waxa ay ku xisaabanyihiin shaqallka.

Xarfahaan “W” iyo “Y” waxay habdhaqanka shaqalka qaadan karaan waa marka ay ugu danbeeyaan alan shaqal gaab ah.

Godadka tixdu way ku kala duwan yihiin tirada shaqallada baydka. God kasta wuxuu leeyahay tiro shaqallo ah oo baydkiisu ku socda, iyo tirada alan ee baydka iyo intooda shaqal dheera ah, iyo habka ay u tixmaan alamada baydka. Dhanka tirada shaqalladu, u firso tusaaleyaashaan:

- | | | |
|---|-----------------|-------------|
| 1) Doqontii ku yeeshaa wax uun,
(20) gabay | lagu dabiibaaye | 12+8 |
| 2) Calool nugulaa caruur-
(18) Buraanbur | tayda aabohood | 10+8 |
| 3) Kaana sib, kanna saar
Geeraar | | (9) |
| 4) Deelee durbaanleey
jiifto | | (9) |
| 5) Inkaar waa loo dhintaa
saar | | (10) |
| 6) Geedhba geedka u dheer, | laga garaacyey, | |
| Galoo mudhay mullaaxdii(yey) | | 9+7+10 (26) |
| H.kebedda | | |

Baydadka godadka tixdu waa kala dherer, waxaana halkaa ka dhasha tirada lugaha baydka ku koobmo. Baydadka gaagaaban waa hal lug sida geeraarka iyo jiiftada, kuwa dhererka dhexena waa laba lugood sida gabayga iyo buraamburka, kuwa dheedheerna waa seddax lugood sida heesta kebedda. Tusaalayaasha hore u firso.

Labada lugood ee baydka waxaa u dhaxeeya nasasho (caesura) ama (space). Marka luuqada nasashadaasi dhawaaqa qofka ayey ka muuqaneysaa, oo hakad neeftada ah ayaa dhawaaqa qofka gelaya. Hadduu baydka qoraal yahayna koma (,) ayaa la adeegsadaa oo halkii nasashada gelaya (fiiri faahfaahinta hore ee habka qoridda tixda).

Gorfaynta dhismaha baydka ama meeriska tixda waxaan mar kasta wada cuskaneynaa tirada alan iyo intooda shaqal dheer ah. Waxaan

Suugaanta Soomaalida

baareynaa tirada ala nee abaydka, iyo inta shaqaldheer ee ku jira. baydka tix ee god gaar ahi wuxuu ka unkamayaa tiro alamo ah, oo tiro xadidan oo ka mid ahi shaqaldheer yihiin, oo hab gaar ah u taxma.

Dhambalan

Alamada baydka/ lugata waxaa ku dhaca “dhanbalan”. “dhanbalan” waa alan shaqaldheere oo u kala jaba laba alan oo shaqal gaaba. Marka dhanbalan dhacaba tirada lammada lugta waxaa ku kordha hal lambar, tirada shaqal dheeraha waxaa ka dhinma hal lambar. laakiin wadarta shaqallada lugtu waa sideedii, oo ma kordhin mana dhinmin. Waayoo, laba shaqalgaab waa hal shaqaldheer, sida $1+1=2$!

Sidaas darteed, dhanbalanku waa furfuran ama sarriifan gudaha oo ku dhacaya/ lugta, oo alanku isku badalayo noociisa iyo tiradiisa, guud ahaanta tirada shaqallada ee baydka/ lugta waxba iska ma badelin oo waa sidoodii. alanka shaqal dheeraha ah ayaa u sarriifmaha laba alan oo shaqal-gaab ah. Dhanbalanku tirada shaqallada ma kordhiyo mana dhimo, sida sarriifkuba lacagta aanu u dhimin una kordhin ee nooceeda bedela kaliya.

Baydadka godadka qaarkood isku dherer ayay noqon karaan, laakiin waxa ay ku kala duwanaanaayaan noocyada alamada iyo taxnaantooda. Tusaale ahaan, baydadka geeraarka iyo jiftadu waa isaga mid xagga tirada shaqallada; laakiin waxa ay ku kala duwan yihiin noocyada alan iyo habka taxmida. Bal u fiirso baydadka 3 & 4 ee tusaalaha kore. Guud ahaanba, noocyada alan ee baydka (shaqaldheere mise shaqalgaab), iyo habka taxnaanta xubnahaas ee baydka gudihiisa, labaduba kaalin mug leh ayay ku leeyihiin miisaanka tixda.

Mar kale aan xasuusanno, miisaanka tixda waxaa lafdhabar u ah, oo uu ku socdaa:

- 1) Tirada shaqallada baydka;
- 2) Tirada alan ee baydka iyo inta shaqaldheere ka ah; iyo
- 3) Habka taxnaanta alan ee baydka.

Gabay

Gabaygu waa god ka mid ah godadka tixda soomaalida, waa boqorka maansada ugu sarreeya xagga qiimeynta iyo tix gelinta. Baydka gabaygu wuxuu ka unkamaa labada lugood oo macne ahaan isbuuxiya, xarafka qaafiyaddu waa inuu baydka gabayga ku soo arooraa ugu yaraan la mar, lug kasta min hal mar, baydka gabay wuxuu ka koobanayahay (20) ama (21) shaqal oo si gaar ah isugu taxan.

Suugaanta Soomaalida

Miisaanka gabaygu waxa uu ku socdaa sartiisa caanka ah:

Hooyaalayeey hooyaalayeey, hoyalayeey hooyee
 2 2 1 2 2 2 1 2 = 12 1 1 1 2 2 2 = 8
 (12+8=20)
UU UU V UU UU V UU UU V UU UU V
 V UU UU V UU UU V UU UU V UU UU V
 (farcame)

Lugta hore, oo horaad ama hojis la yiraahdo waa (hooyaalayeey hooyaalayeey), lugta labaad, oo dambeed ama hooris layiraahdana waa (hoyalayeey hooye). Sida badanna lugta hore waa (12) shaqal, mararka qaarna (13) shaqal ayay noqotaa, waana farcame ee asaal maaha; halka lugta dambe tahay shaqal.

Xarafka qaafiyaddu waa inuu baydka ama meeriska gabayga soo arooraa ugu yaraan laba jeer, mar horaad ka ah, iyo mar dambeedka ah; wuuna ka badan karaa ladaa jeer.

1) Dan/ga/raa/ra/dii na/gu dhac/di/yo, we/bi da/baa/shii/sa
 1 1 2 1 2 1 1 1 1 1 1 1 1 2 2
 1 12+8 = 20

2) In/ kas/too da/leel na/la dhi/gaan, dooc/na na/gu
 cay/man
 1 1 2 1 2 1 1 1 2 2 1 1 1 1 1
 12+8=20

3) Duuf/laal/la/dii na/ga ha/dhow, dan i/yo xee/shiin/na
 2 2 1 2 1 1 1 1 1 1 1 2 2 1
 12+8= 20

U firso “Y”da dhacdiyo (bayd 1) waxaan u tirinay shibane ahaan,; laakin “y”da cayman (baydka 2), iyo “w”da hadhow (bayd 3), waxaan u tirinay iney shaqal yihiin.

Tixdii uu cumar usteeliye ku amaanay geela waxaa ka mid ahaa:

Adhi waa dhalaan iyo haween, dhimiradiisiye
 12+8=20
 Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa, dhuubka haraneede
 12+8=20

Suugaanta Soomaalida

Dhaqaalaha haweenkiyo guryaha, siima dhaafsana'e
12+8=20

Lo'da dhiiqda laga maalaiyo, dhayda iyo xoorku
12+8=20

Dhudhunkay biyaha kula jirtiyo, dhabarka weeyaane
12+8=20

Kol hadday abaaruhu dhacaan, dhimatay geesleeye
12+8=20

Ragga laxaha sii dhawrayow, dhaqasho waa geele!
12+8=20

Abwaan maxamed gacal xaayow¹ guurowgiisii waxaa ka mid ahaa:

Dhalinyarada soomaalidee, sida xun caadeystay
12+8=20

Sinjigey bedelataye wixii, sababay ceebaalka
12+8=20

Sahalaan jawaab uga rabnaa, waa su'aal furane!
12+8=20

(1) muqdisho ku geeriyooday 16-05-2011

Baydka gabaygu wuxuu ka koobanyahay laba lugood, horaad iyo dambeed. Lug kastaa waxa ey ka koobantahay tiro alamo ah dhismaha alammaaha iyo taxnaantooduba waxay ku socotaa miisaan leh xeerar qeexan. Si aan uga baaraan degno dhismaha baydka gabayga, aan marba mid falanqeyno lugaha horaadka iyo dambeedka.

HORAAD (HOJIS)

Lugta horaadka gabay waxay ka koobantaa 12 shaqal, waxaysa noqon kartaa 13 shaqal. badiba lugta horaadka gabaygu waxay ku timaadaa 12 shaqal, sidaa darteed waxaa la yiri asal. Maadaama aanu gabayga ku badneyn horaadka 13 shaqal ah, waxaa laga soo qaataay farac, waxaan la yiri farcame. Horaadka gabay waxa uu ku yimaadaa lix waji sarta uu ka unkamaana waa wajiga todoba-shanlaha.

Suugaanta Soomaalida

Dhismaha alammada ligta horaadka ee gabaygu, marka la eego tirada iyo dhismaha alammadeeda, waxay ku timaada lix waji, oo kala ah: 7:5, 8:4, 9:3, 10:2, 11:1 iyo 12: 0. Waxaa loo jeedaa lugta horaadku waxay ka koobantahay todoba alan oo shan ka mid ahi shaqal dheere yihiin, ama siddeed alan oo afar ka mid ahi shaqal dheere yihiin, ama sagaal alan oo seddax ka mid ahi shaqal dheere yihiin, ama toban alan oo laba ka mid ahi shaqaldheere yihiin, ama toban iyo kow oo hal ka mid ahi shaqal dheere yahay ama toban iyo laba alan oo wada shaqal gaab ah oo aan shaqal dheere lahayn. Waxaana loo akhriyaa todobo-shanle, siddeed-afarle, sagaal-seddaxle, toban-labaale, tobaniyokow-kowle, tobaniyolaba-eberle, siday u kala horreeyaan.

Horaadka gabayga waxa uu ka unkamaa wajiga todobo-shanlaha (7:5), oo loola jeedo wuxuu ka unkanyahay todoba alan oo shan kamid ahi shaqaldheer yihiin, sarta horaadka gabaygu waa todoba-shanle, waana :

7:5 Hoo/yaa/la/yeey/ hoo/ya/leey, hoyalayeey hooye
UU UU V UU UU UU V UU

Shanta waji ee kale oo horaadka waxay yimaadeen dhambalan ku dhacay sarta horta horaadka todobo shanlaha ah. “*Dhambalan*” waa alan shaqaldheere oo u sarifma laba alan oo shaqal gaab ah marka dhambalan dhacaba tirada alammada lugat waxaa ku kordha hal lambar, tirada shaqal dheerahana waxaa ka dhinma hal lambar. Laakiin wadarta shaqallada lugtu waa sideedii, oo ma kordhin mana dhinmin, sida sarriifkuba aanu tirada lacagta u kordhin ama u dhimin.

Wajiga horaadka todobo-shanlaha ah (7:5) marka alan shaqal dheer u dhambalmo laba alan shaqal gaab, wuxuu isu rogayaa wajiga siddeed-afarleey (8:4). Haddii sidaa lagu sii wado, oo marba alan shaqal dheer ahi u kala dhambalmo laba alan shaqalgaab, waxaan gaaraynaa toban iyo laba alan oo wada sahaqal gaab ah (12:0). Waana waji dhif ah oo aalaaba lahelin. Ogow mar walba tirada shaqallada horaadku waa 12. Waa kuwaan tusaalayaasha lixda waji ee horaadku:

7:5 gaa/gaab/so oo aa/mus yaan, gaadh lagaa qabane
UU UU V UU UU V UU

8:4 Duuf/laal/la/dii na/ga ha/dhow, dan iyo xeeshiina
UU UU V UU U U V UU

9:3 In/kas/too da/leel/ na/la dhi/gaan, doocna nagu cayman
U U UU V UU U U V UU

Suugaanta Soomaalida

10:2 Dan/ga/raa/ra/dii na/gu dhac/di/yo, webi dabaashiisa
U U UU V UU U U V U U
11:1 lix/dan a/ni/ga oo ji/ra ta/shi/ga, laydha iga raacay
U U U U V UU U U V U U
12:0 bad wax ma/ra bar/ri/ga wa/xa ji/ri/yo, buuro
dabadooda
U U U U V U U U U V U U

Horaadka farcama ah tirada shaqalladiisu waxay noqdaan 13 shaqal, shaqalka farcamuhu waxa uu dhacaa bilawga baydka. Wajigii todoba-shanlaha marka shaqalka farcamuhu raaco wuxuu noqonayaa siddeed-shanle. U firso baydkaan tusaalaha ah:

8:5 a/duun/baa qu/raac/de rag baa, qada habeenkiiye!
V UU UU V UU UU V UU

9:4 a/noon boog/ta wa/da taa/ba/noon, idin tusaaleynin

10:3 dha/qaa/laa ha/ween/ki/yo gur/ya/ha, siima dhaafsana'e

Xagga taxnaanta alammada horaadku waxay raacaan xeer aan laga weecin karin. Xeerka taxnaantu wuxuu qeexayaa, marka alanka shaqal dheeraha lagu sargooyo, meelaha ay alamada shaqal dheerku geli karin, iyo meelaha ka caagan. Haddii si kale aan u niraahno, habka taxnaatu waxa uu tibaaxayaa kaalimaha noqon kara shaqaldheer ama shaqal gaab iyo kaalimaha noqda shaqalgaab kalia ah, kana caagan shaqaldheer. Bal aan mar kale u fiirsano sartii gabayga:

7:5 hoo/yaa/la/yeey hoo/ya/la/yeey/ , hoyalayeey hooye

Sarta horaadka gabay waa wajiga todoba-shanlaha ah, waxaana shaqalgaab ah shaqallada 5aad iyo 10aad markasta waxay noqdaan shaqalgaab, lama arag iyagoo shaqaldheer noqda.

U firso horaadka baydkaan oo todoba-shanle ah, kaalimaha shaqaldheeraha noqday, iyo kuwa shaqalgaabka ah, kuwa shaqalgaabka ah ayaan hoosta ka xariiqnay:

Gaa/gaab/so oo aa/mus yaan, gaadh lagaa qabane
Geed buu ku saa/raa kol/kuu, kuu gol leeyahaye
Waa soo sidh/naa xeedh/yi/hii, saabka loo tolaye
Guu/guu/li/hii/yow had/daad guga u ooyeyso

Suugaanta Soomaalida

Markasta shaqalka 5aad iyo 10aad waa shaqal gaab, inta kalena waa shaqal dheer.

Bal aan eegno shantii waji ee kale ee horaadka gabay.

8:4 Duuf/laal/la/dii na/ga ha/dhow,	dan iyo xeeshiina
Oo aan ga/diid maa/lin/ni/mo,	soo
hadhgalahayne	
9:3 In/kas/too da/leel/ na/la dhi/gaan,	doocna nagu
cayman	
Kal la/xii/baan lee/yi/hi/yo,	laabta xuunshada'e
10:2 Dan/ga/raa/ra/dii na/gu dhac/di/yo,	webi dabaashiisa
Kol had/daan gac/ma/ha loo xin/nayn,	kuma
gaduutaane	
11:1 lix/dan a/ni/ga oo ji/ra ta/shi/ga,	laydha iga raacay
Ra/gan/ni/mo ni/maan ta/cab ku a/rag,	aa yar heli
waaye	
12:0 bad wax ma/ra bar/ri/ga wa/xa ji/ri/yo,	buuro
dabadooda	

Tusaalooyinkaan hore waxay ina tusayaan in wixii shaqallada 5aad iyo 10aad ahayn ay noqon karaan shaqalgaaban ama shaqaldheer. Wax kalena maaha waa wajigii todobo-shanlaha oo dhambalmay, oo marba shaqaldheer u sarifmay laba shaqalgaab. Xeerkaa taxnaata ee horaadka gabayna waxaynu u ballaarin karnaa sidaan:

Xeerka taxnaanta horaadka gabay wuxuu tibaaxayaa inmar kasta shaqallada 5aad iyo 10aad ee horaadku ey yihiin shaqalgaab kana caagan yihiin shaqaldheere, shaqallada kale way noqon karaan shaqalgaab iyo shaqal dheere intaba.

DANBEED (HOORIS)

Lugta danbeedka ama hooriska gabay waxay ka koobantaa 8 shaqal oo joogto ah. Waxayna ku timmadaa hal waji oo ah lix-labale (6:2), oo macnaheedu yahay lix alan oo laba kamid ahi shaqalldheere yihiin, sida ku cad sarta gabayga.

Hooyaalayeey hooyaleey, ho/ya/la/yeey hoo/ye

Xagga taxnaanta ee dambeed gabay, bal aan u fiirsano tusaalooyinkaan, innagoo hoosta ka xariiqeyna shaqallada 3aad iyo 8aad, iyo meelaha labada shaqaldheere gelayaan oo aan lambarka kaalimahooda ku hor qoreyno:

Suugaanta Soomaalida

Gaagaabso oo aamus yaan gaa/dh la/gaa qa/ban/e (1&3)

Waa soo sidnaa xeedhyihii, saab/ka loo to/lay/e____(1&3)

Doqonbaa halkii lagu qatali , qoor/ta soo dhi/gan/e (1&3)

UU V UU U U V

Geeluba ugaasoy haduu, ay/da mi/ra/naa/yo (1&5)

Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh, meel ku wa/da yaal/le
(1&5)

Allalabiyo o toban jeer miyeey, liid/ni/mo I raac/day (1&5)

UU V U U UU V

Kol had/daan gac/ma/ha loo xin/nayn, ku/ma gu/duu/taa/ne
(4&5)

In gar xirata ama guudka dabi, ge/yi/ga soo/maa/li
(4&5)

Dangaraaradii nagu dhacdiyo, we/bi da/baa/shii/sa
(4&5)

U U V UU UU V

Tusaalooyinkaan hore waxaa innoga cad in shaqallada 3aad iyo 8aad ay mar walba shaqal gaab yihiin, oo shaqaldheere ka caaganyihiin. Labada alan ee shaqaldheeraha ah ee dambeed gabay waxay gali karaan afarta alan ee kala ah 1,3,4,&5, waxa ku yimaadaan sedax weji oo kala ah (1&3) (kowiyo sedexle), 1&5 (kowiyo shanle), 4&5 (afariyo shanle).

Haddaba xeerka taxnaanta ee dambeed gabay wuxuu tibaaxayaa in shaqallada 3aad iyo 8aad ee dambeedku had iyo jeer yihiin shaqalgaab kana caagan yihiin shaqaldheere.labada alan ee shaqaldheeraha ahi waxa gali karaan afar kaalimoo, waxayna ku yimaadaan sedax weji mid kood, oo kala ah 1&3 (kowiyo sedaxle), 1&5 (kowiyo shanle), 4&5 (afariyo shanle).

Jiifto

Jiitadu waa god kamid godadka maansad soomaalida. Baydka jiiftadu wuxuu ka koobanyahay hal lug oo ka kooban (9) shaqal oo sigaar ah isugu taxan, wixii ka duwani waa farcame. Xarafka qaafiyaddu waa inuu baydka jiiftada soo galaa ugu yaraan hal mar. isticmaalka jiiftadu aad buu u badanyahay hore iyo hadaba tusaale aan soo qaadano heestii “kii noo hagaagee “ oo erayadeedu jiifto yihiin:

Suugaanta Soomaalida

Waan heesayaayee
Sanad waliba hoodiyo
Howl iyo dhibaatiyo
Wuxuu hadimo leeyahay
Waa laga helaayoo
Hadhow lagu xasuustaa,
Kii noo hagaagee
Noqo loo hanwaynyahay
Qaar kaa horeeyoo
Hodonaa na dhaafee
Halkii loogu talo galay
Ka habaabi mayside
Kuwa hadhayna dabadaa
Waa la hubsan doonaa;
Kii noo hagaagee
Noqo loo hanwaynyahay

Marka aan gorfayno jiiftada, baydkeedu waa sagaal shaqal, sarta uu ka unkamaana waa shan-afarle (5:4) yacnii shan alan oo afar kamida ay shaqaldheer yihiin. Marka dhambalan ku dhaco alammada shaqaldheeraha ah ee ay u sarifmaan alamo shaqal gaab ah, waxaa soo baxaya wejiyada lix-sedaxle (6:3), todobo-labaale (7:2), sideed-halle (8:1) iyo sagaal-eberle (9:0) oo tiro ahaan yar. Halkaas waxaa innooga soo baxaya in baydka jiiftadu ku yimaado shan weji.

Deel/leey dur/baan/leey (5:4)

Ruux/xaad su/gay/soo (5:4)

UU UU V UU UU

Saa/xiib ma na/bad/baa (6:3)

UU UU V U U UU

Qa/lin baa sa/xii/xee (6:3)

Suugaanta Soomaalida

U U UU V UU UU

Waan ku/la soc/ daa ga/ro (7:2)

UU U U V UU U U

Saa/xiib/bo a/dag i/yo (7:2)

UU UU V U U U U

Ruux sa/cab/ku ma/dhan/ya/hay (8:1)

UU U U V U U U U

i/ya/doo nin sa/re qa/bo (8:1)

U U UU V U U U U

Nin la si/gay ma na/bad ga/lay (9:0)

Si/day a/ni/ga i/la ta/hay (9:0)

U U U U V U U U U

Marka aan u fiirsano tusaalayaasha hore, waxaa innoo muuqanaya in shaqalka 5aas ee baydka jiiftadu mar kast yahay shaqalgaab, halka ay shaqallada kale noqon karaan shaqalgaab ama shaqaldheere.

Habka taxnaanta ee baydka jiiftadu wuxuu tibaaxayaa in mar kasta shaqalka 5aad ee baydka jiiftadu yahay shaqalgaab, kana caagan shaqaldheere.

Xagga adeegsiga godka jiiftadu wuu ka badanyahay heesaha muusiga ee casrigaan, xilliyadii horena adeegsiyo kala duwan ayuu kuyimid.

Masafo

Masafadu waa nuuc kamida ah maansada, waana jiiitfo laba lugood ah, oo loola jeedo in macnuhu kutusayon in labada bayd ee isku xiga la isla akhriyo sidii ayagoo hal bayd isku ah.

Masafadii “doodna waxaan u leeyahay” ee Sayid Maxamed Cabdulle Xasan waxaa kamid ahaa dhextaalkaan:

Afartaa dubbeyaye, ma daabacay sidaydii

Madaleeyay maansada, damiinbaan aqoonine

Hadal diirsimaad gala, duri waa u odhanjiray.

Suugaanta Soomaalida

Heesaha xilligaan waxaa kamida masafadaan:

Aqal tiir la'aantii, kaligii ma taagnee

Haddeynaan is taakulayn, tabar yeelan maynee

Ka tashada cadaawahoo, isku tiirsanaada!

Tabaalada aduunyada, kolba qolaa ku taagane

Tallaahaan ku dhaartaye, hurdo nooma toosnee

Ka tasgada cadaawahoo, isku tiirsanaada!

Tummaatida dhexdeeniyo, intaad waranka tuurtaan

Ka tashada cadaawahoo, isku tiirsanaada!

Buraanbur

Buraanburku waa god kamid ah godadka tixda, wuxuuna u qaybsamaa laba lugood.

Xarafka qaafiyaddu waa inuu baydka buraanburka soo arooraa ugu yaraan laba mar. oo midba lug ku jiro sida godka gabayga. Baydka buraanburku wuxuu ka koobanyahay (18) shaqal oo si gaar ah isugu taxan, lugta horaadka waa (10) shaqal asal ahaan, lugta dambeedkuna waa (8) shaqal, waa la arkaa lugta hore oo (11) shaqal ah waana farcame.

Buraanburka badanaaba waxaa tiriya haweenka. Sidaas darteed, ayaa loo yiraa buraanburku waa maansada haweenka.

Tusaalaha buraanburka waxaa kamid ah baydadkaan ay xaliimo soofe tirisay:

Calanka soomaaliyee-, dow carshiga ka nuur

cirkaad u'egtahaye rabbi-, yow lagaa cabsado

intaadan cadaan cabiid, baanu wada ahayn

allow noo kaa calafe, waanu ciilanayn

Calool nugulaa caruur- teyda aabahood

Intuu I caayaa buu, caasha luul I yidhi

Suugaanta Soomaalida

Buraambur kalana wuxuu ahaa:

Dad baa u go'doomay dadbaa,	geedo lagu xidhxidhay
Inay go'een iyo dadbaa,	geeri loo malayn
Dad baa indho beelayoo,	loo hayaa ushii!

Sarta baydka buraamburku waa sidaan, deedna dhambalan ayaa ku dhaca:

U <u>UU</u> <u>UU</u> <u>UU</u> V <u>UU</u>	<u>UU</u> U <u>UU</u> V <u>UU</u>
<u>UU</u> U <u>UU</u> <u>UU</u> V <u>UU</u>	U <u>UU</u> <u>UU</u> V <u>UU</u>

Bal aan ka baaraan degno horaadka baydkan buraamburka:

6:4 Si/dii geel deyr dha/luu,	doobi uga sidaa
U <u>UU</u> <u>UU</u> <u>UU</u> V <u>UU</u>	
6:4 Baa/lal yay sii/ya oo ,	caawa yayska bida
<u>UU</u> U <u>UU</u> <u>UU</u> V <u>UU</u>	
6:4 waan cus/laa/doo/ a/daan,	caashaq kugu ahaa
7:3 Ca/lan/ka soo/maa/li/yee-,	dow carshiga ka nuur
7:3 gar/tii wee/ya/noo ga/ban-,	too baxduu ogyahay
7:3 doo/rar/kii/qa/bay/na haad,	baa daleel ku cunay
8:2 si/daan u dam/qa/day ca/loo-,	sheydii wali ma damin
8:2 Bi/sin/ka/ka bi/laab shey-,	daan ha baygagee
8:2 waa da/reen cu/lu/se shi/cib-,	kow dan ugu is taag
9:1 Duu/mo i/yo cu/dur/ba a/wel-,	baan la daadsaneyn
9:1 an/na/gu/na ku/gu ceesh/ne il/ma-,	haagu ku cayile
9:1 wa/xay dam/ca/ha/yaan xor/ri/yad-,	deena inaan la durin
10:0 sed/dax/da na/ga ma/qa/ne is/tic-,	maarku kala suntaday

Sida baydadk hore innooga muuqata horaadka buraamburku wuxuu ku yihid shan waji oo kala ah todobo-sedaxle (7:3), siddeed-labaale (8:2), sagaal-kowle (9:1), iyo toban-eberle (10:0); wajiga (10:0) waa dhif

Suugaanta Soomaalida

aad buu tiro ahaan u yaryahay. Sarta uu ka unkamo horaadka buraamburku waa wajiga lix-afarle (6:4) , deedna waxaa ku dhaca dhambalan ay alammada shaqal dheeruhu u sarrrifmaan alammo shaqalgaab ah, waxaana halkaa ka soo baxa afarta waji ee kale.

Asal ahaan tirada shaqallada horaadka buraamburka waa (10), waa la arkaa inuu (11) noqdo waana farcame oo ma badna. Baydadkaan ayaa tusaale ah:

7:4 Ga/cal/kii lay sii/ya/yee, guul/le ii gar/taay

8:3 waa tii af/ri/kaan/ku u/ru- roo la wada ogaa

9:2 waa/tii ar/da/sa/ba/ba la/gu, gaafay aadminimo

9:2 caa/lam/ka a/di/gaa is/ka leh. Oo carrada xukuma

Habka taxnaanta ee horaadka buraambur, mar kasta shaqalka 8 waa shaqalgaab ka caagan shaqaldheer.

Haddanaa aan eegno dambeedka baydadkaan:

Bisinka ka billaaba shey-, daan ha bay/ga/gee 5:3

UU U UU V UU

Calool nugulaa caruur-,tay/da aa/ba/hood 5:3

Asaay bay dumarku qaa-, daan di/raac wal/ba/ba 6:2

Calanka soomaaliyee-, dow car/shi/ga ka nuur 6:2

Sidaan u damqaday caloo-, shey/dii wa/li ma da/min 7:1

U UU U U V UU

Lagama daaweeyo ruu-, xey/na da/qar ku dha/co 7:1

Howsha weysaga mid oo, mi/di/na ka/ma hadh/sa/to 8:0

Sida baydadka hore innooga muuqata dambeedka buraamburku wuxuu ku yimid afar waji oo kala ah shan-seddaxle (5:3), lix-labaale (6:2), todoba-kowle (7:1), siddeed eberle (8:0) wajiga (8:0) waa dhif oo aad buu tiro ahaan u yaryahay. Asalku waa shan alan oo seddax shaqal dheere tahay (5:3) , alammada shaqaldheeraha ah ayaa deedna u dhambalmaya laba shaqal-gaab, ilaa ay isu wada rogaan shaqalgaab.

Habka taxnaanta ee buraambur, mar kasta shaqal 6aad waa shaqalgaab ka caagan shaqaldheere.

Suugaanta Soomaalida

Xagga adeegsiga buraambur maanso iskeed u taagan, oo waa la' arkaa iyadoo la buraamburayo kaliya. Sidoo kale, waxaa la arkaa inuu wato ciyaar, sida xafladaha arooska iwm, oo markaa waa nooc ka mid ah hees ciyaareeda.

WAAXAHA TIXDA

Tixda soomaaliyeed waxay ka koobantahay waaxo isku sargo'an; oo kala ah: 1) Arar 2) Duluc 3) Dhextaal iyo 4) Gunaanad.

Dulucdu waa tiir dhexaadka tixda, sidaas darteed tix kastaa waxay leedahay u jeedo iyo fariin ay xambaarsantahay. Waaxaha kale qurux iyo falsanaan ayay u kordhiyaan tixda, ka tigiistooduna ceeb ma keento. Sidaa darteed sedaxda waaxood ee kale waa laga tegi karaa, siiba marka tixdu gaabantahay.

1. Arar

Arartu waa hordhaca tixda, waxaa loogu gogol xaaraa doodda iyo dulucda tixda, wayna ka koo bantahay erayo ama baydad badan. Tixdu waxay ararta kala mid tahay guud ahaanba suugaanta.

2. Duluc

Dulucdu waa danta iyo fariinta tixda looga golleeyahay. Waa doodda tixdu soo gudbinayso. Baydadka tixda intooda badani waxay xambaaraan dulucda, halka waaxaha kale ee tixdu ay naqdaaan baydad ama erayo kooban.

Marka dulucda iyo doodda tixdu dheertahay, sida badan wuxuu halabuurku u jejebiyaa qaybo is kaabaya, oo qayb kasta ay soo gudbinayso fikrad kooban oo dulucda kamid ah. Laba qaybood oo kasta oo dulucda kamid ahna, sida badan, waxaa kala dhexgala dhextaal.

Hadraawii maansadiisii durdur wuxuu dulucda u qaybiyay todobo qaybood, oo qayb kasta soo gudbinayso qayb kamid ah dulucda.

3. Dhextaal

Dhextaalku waa erayo ama baydad kooban, oo kala dhexgala qaybaha dulucda. Sida badan dhaxtaalku wuu soo noqnoqdaa, wuxuu noqonkaraa mid isku mid ah wuuna kala duwanaa karaa tixda dhaxdeeda. Dhextaalku wuxuu ku dareen siiyaa inay dhammatay fikrad kamid ah dulucda, loona gudbayo fikrad kale oo duluc ah.

Suugaanta Soomaalida

Waxaa la arkaa in mararka qaarkood halabuurku aanu dhextaal u yeelin maasadiisa; gaar ahaan kuwooda gaagaaban.

4. Gunaanad

Gunaanadku waa erayo ama baydad kooban, oo lagu soo ebyo tixda.

Halabuurku wuxuu
sagootiyaa
akhristayaashiisa,
gebengebeeyaa tixda.
halabuurku aanu
maansadiisa, gaar ahaan
markay gaabantahay.

ARAR
DULUC1
DHEXTAAL
DULUC2
DHEXTAAL
DULUC3
GUNAAANAD

gunaanadka ku
dhegaystayaashiisa ama
wuxuuna ku soo
Waxaa la arkaa in
gebegebo u yeelin
kuwa gaagaaban, siiba

ARARTA

1) Ararta iyo ujeedada laga leeyahay,

Arartu waa hordhaca maansada, waxaana loogu gogol xaaraa dulucda iyo dooda maansada, waxayna ka koobantahay erayo ama baydad kooban. Maansadu waxay ararta kala mid tahay guud ahaanba suugaanta. Ararta tayaysani waa ta saamaynta leh, ee dareenka soo jiidata

Arartu lama huraan uma aha maansada, laakiin way bishaa, la'aan teeduna ceeb maaha. Waxaa loo arartaa illaa dhawr arrimood oo ay kamid yihiin:

Si loo soo jeediyo, loona soo jiito dareenka dhagaystaha ama akhristaha.

Si loo cusleeyo, qiimaha qiimana loogu yeelo ujeedada iyo dulucda soo socota. Tanina waxay ku immaan kartaa in lasheego abwaanka maansadaan cirinay iyo qiimisiiha; in la sheego aqoonta dheer ee ilaahey u hibeeyay halabuurka; ama qiimaha iyo tayada erayada soo socda ee abwaankaan lagu yaqaano.

Suugaanta Soomaalida

Marka loo kuur galo maansada soomaalida, waxaa muuqanaya dhawr hab oo loo ararto in kastoo u jeedada ah soo jiidashada dareenka dhagaystaha ama akhristaha ay isaga mid yihiin. Sidaas darteed arartu waxay yeelanaysa dhawr nuuc oo ay kamid yihiin:

2) Noocyada ararta

Marka aan u kuur galno maansooyinka kasoo maaxday maskaxda maansayahannada soomaaliyeed, waxaa innoo soo baxaya dhawr nuuc oo arar ah, waxaana kamid ah:

1. Gabay ku faanka iyo goodinta
2. Sawirrida xaaladda nafsiyadeed ee halabuurka
3. Ka jawaabida guuxa iyo su'aalaha bulshada
4. Murti iyo xikmad
5. Gogolxaar kooban ee dulucda
6. Arar dhafan

2.1: gabay ku faanka iyo goodinta

Ararta gabay ku faanka iyo goodinta wuxuu maansoyahanku ku faanaa maansadiisa, isagoo muujinaya: tayada sare ee maansadiisa iyo macnaha balaaran ee ay xammbaarsantahay; kartidiisa halabuurnimo iyo hidaba gaarka ah ee uu ilaaheey u siiyay curinta maansada; af aqoontiisa iyo sida xaragada leh ee uu erayada afka u adeegsan karo; muujinta aqoonta baaxadda leh ee uu leeyahay.

Waxaa kale ee uu abwaanku u adeegsadaa ararta sidii uu weerar culus iyo goodin baqa gelisa uu ugu gaysan lahaa halabuurkale oo kaftan ama dagaal suugaaneed kala dhexeeyo.

Marka loo kuur galo maansooyinka soomaalida waxaa muuqata in ararta gabay ku faanka iyo goodintu ay tahay nuuca ugu badan

Nuucan waxaa tusaale fiican u ah arataan Cabdullahi Suldaan Timacadde leeyahay:

Indhawaydba qaarkiisa gabay	qaad isma lahayne
Wax waliba qisuu leeyihiyo	qar iyo maamuuse
Qawaaniinta maansaduna waa	qalad la'aan sheege
Halkaan xarafku kuu qabanba waa	laga qandoobshaaye
Maansada qaraamigaan yaryare	qeyliyaa dilaye.
Qarka oroba qaaliga faraaas	qooriyada maarsi

Suugaanta Soomaalida

Qururxdii almaan iyo dhulkii	muuse laga qaaday
Qalcadihii burburay reerahay	qaraydu yeedhaysay
Ninna lama qasbine wow qasdeen	inay qasaaraane
Wuxuu qalinku meeraba markii	laysu wada qaatay
Qab baa rag isu geeyaye markay	qaraxday baaruudu
Taangiga qafilan maalintuu	qaatay minawaarku
Qalladii jabaan lagu dhufayuu	qoob la rogi waayay
Qumbulooyinkii oo kalaan	maanta qubayaaye
Haddaad qaban kareysaan	araar qaaliyaan tirine

Arartaan waxaa leh Cabdi Muxumed Ow Magan “Cabdi Gaylax” wuxuuna ku faanayaa aqoonta dheeraadka ah ee uu u leeyahay dhulka iyo dadka soomaaliyeed wuxuuna yidhi:

Tunka Ayl Taleex iyo Nugaal	tirire meeshiisa
Taalada Hargeysiyo Burciyo	tacabka Buuhoodle
Tareenada Jabuutiyo intii	taanga laga gaadho
Togga Adari tuulada Wardheer	Tub iyo Laasoole
Tigin iyo mareeraale iyo	wabiga teebkiisa
Toobiga Wajeer loo mariyo	turubka Baardheere
Tuuf iyo Quraanyow Garaha	labada Tooxooda
Tunni iyo Abgaal iyo Hawiye	Tuur caddiyo booran
Mareexaanka tuuraha gedood	togo ku maalaaya
Majeerteenka taagtiyo hartiga	turuqa waaweyne
Iidoorka wada taajiriyo	tiirka habaryuunis
Ogaadeenka tamashleynayee	tirada loo daayay
Intaasoon turaab iyo dhul iyo	tol iyo meel sheegay
Ta’da gabay anaa yuusufow	talaskaw sida’e

Suugaanta Soomaalida

Teebkiyo fartaan qoray nafluhu tacajab weeyaane

Dadkuna ii tixgeli meeshaniyo toban jirkaygiiye

Anigoon todoba gaarin baan taani ku ahaaye

Abwaanka oo arartiisa ku muujinaya aqoontiisa afka iyo xeeldheerida gaarka ah ee u leeyahay, waxaa tusaale u soo qaadanaynaa siinleydii “ka rog oo haddana saar” ee uu curiyay Maxamed Ibraahim Warsane Hadraawi, oo uu ku bilaabay.

Sabkax oo haddanaa seed

Seeman oo haddanaa sulan

Sidkan oo haddanaa sagan

Sahlan oo hadana sudan

Sal leh oo hadana sigan

Sillan oo hadana sugan

Subkan oo hadana solan.

Af-soomaaligaygow

Lagu saari waayow

Wax sawaaban noqotee

Maxaan kuu sameeyaa!!!

2.2 Sawiridda xaaladda nafsiiyeed ee hal abuurka

Mararka qaarkood abwaanku wuxuu u adeegsadaa arartiisa si uu sawir iyo muuqaal inooga siiyo xaaladdiisa shaqsiyeed iyo nafsiiyaadka uu maal mahan ku noolaa ee maansada ka keenay. Xaaladdaasi waxa ay noqon kartaa mid naftiisu ku nooshahay werwer, walaal, amaba xanuun ay ku hayaan waayaha adduunayadu.

Sayid Maxamed maansadiisii “Waa Gudban Gaalo Leged” wuxuu ku arartay

Awel maanso waataan gudboo gudhiyay waayaaye

Waa taan galbeedkaas u diray guga hortiiisiiye

Aan gaasheeyo tii xalay hurdada gama’a ii diiday

Ismaaciil Mirena wuxuu ku arartay:

Suugaanta Soomaalida

Gellin dhexe xalaan maxamedow geyrtay oo kacaye

Gam'ina waayay hadalkay I tiri gacalow naagtiye

Cali Cilmi Afyare wuxuu ku arartay:

Xalay saamalaylkii markii uunku wada seexday

Anigiyo senteri gaarhayaa joognay suuqyada'e

Waxaan sugayay mooyee cilmaan saakun ku ahaaye

Sida culima soon xiratay oo soorta cuni wayday

Ama nimaan sidaalayn qabtayn soor la dhugatoobay

Ama qosol safayn noqotayoo saxalku meeraayo

Waxa sabarku ii dhuubtay waa faallo saa'idahe

Abwaan Kayse Xasan Xasan Qaboobe wuxuu ku arartay:

Anoo waayadaan da' furay

Anoo dibnahayga xidhay

U diiday inay hadlaan

U door biday aamusnaan

Xalaan dara gaaxsanaa

Markii duni lay furfuray

Axwaasha dalkeena iyo

Markaan kafadii duldhigay

Dareenku intuu burqaday

Dareershay tixdii mudneyd

Dawaaddiyo buugaggii

Ku daabacay baalashii

2.3 ka jawaabidda guuxa iyo su'aalaha bulshada

Arartaan wuxuu u adeegsadaa abwaanku sidii uu jawaab uga bixin lahaa su'aalo ay bushadu is weydiineyso amab arimo laysla dhex marayo. Badiba arimahan ama su'aalahaan laysla dhex marayaa waxay ku

Suugaanta Soomaalida

saabsanyihiin shaqsiyadda abwaanka iyo gabayadiisa, sida muddadii lasoo dhaafay ee uu aamusay iwm.

Maansadii “Daalacan” ee Hadraawi waxay ararteedu ahayd:

Ma da’furan ogaalkay,
Xaska dabada maan gelian,
Darajada ilhaamkiyo
Hibadii daleysnay
Uma dhiibin duuduub;
Wali dalawadaydii
Doobbigeedi may dhimin;
Dibu dhigasha mooyee
Wax is doorsha may dhicin

2.4 Murti iyo Xikmad

Hal-abuurada qaarkood waxay maansadooda ugu gogolxaaraan murti iyo xikmad joogsi. Murtida iyo xikmadda arartu way noqon karaan kuwa xiriir la leh dulucda maansada, sidoo kale waxaa la arkaa inayna xiriir toosa la lahayn.’

Maansadii “Dareen Guud” ee Xuseen Sh. Axmed Hilowle “Kadare” waxay ararteedu ahayd:

Af daboolan dahabkii
Maskax darartay dooqeed
Abwaan diiray doorkiis
Nin is-diray dadaalkiis
Murti daad ah dulucdeed
Hadal dalb leh dabarkii
Sarbeeb duwan ka-durugeed
Danab dhacay dareenkiis
Daah rogan dabayshiis
Dad islaayay dawadiis

Suugaanta Soomaalida

Majo daalan duugtood

Cadow duwan duqayntiis

Markab degay daryeelkiis

Qabiilnimada loo danay

Inta diidan dawankood.

Waa arar xambaarsan murti iyo xikmad aan waqtina ku xidhnayn, lase odhan karo xiriir bay laleedahay dulucda maansada iyo doodii taagneyd xilligii ay soo baxaysay.

Maansada “Damaq iyo Xasuus” waa maanso baroor diiqa oo abwaan Maxamed Xaashi Dhamac “Gaariye” ka tiriyay geeridii Timacadde, ilaahay ha u naxariistee ararta maansadani waxay ahayd:

Xilli waliba deeqdii

Gammaan waliba xoogii

Xogogaal tibaaxdii

Tulud waliba xoorkeed

Xera waliba qaadkeed

Xeer beegtii taagteed

Xaajana guddoonkeed

Dawlis waliba xaabkii

Xaabo waa bisaylkeed

Xulad waliba qiiqii

Maanso waliba xarakadeed

Xigsin ina suldaan galay

Xiisaheeda gaarka ah

2.5 gogol xaar kooban ee dulucda

Arartaan waxaa loo adeegsadaa sidii hordhac kooban ey ugu noqon lahayd dulucda maansada soo socota. Noocaani wuxuu ku badanyahay maansooyinka waanada, ducada, calaacalka iwm. Ararta noocan ah waxaan u soo qaadan karnaa dhowrkaan bayd ee Xaaji Gooni ugu arartay maanso dheerayd oo hal xiraale ahayd wuxuuna yidhi:

Suugaanta Soomaalida

Rag cayaayir iyo maanso waa camaladiisiiye
Caynaanka anigow hayiyo celiyihiisiiye
Kol haddaan callaqa looma furo cagaha dheeldheelee
Lix iyo toban halaan soo caynimay caynka ka higaadsha.

2.6 Arar dhafan

Inkasta oo arartu leedahay noocyo kala duwan. Haddaan halabuurka arartiisa wuxuu ka dhigi karaa isku dhaf kulminaya dhowr nooc. Wuxuu tusaale fiican innoogu noqon karaa arartii maansada “Dugsi ma leh Qabyaaladi” ee timacadde wuxuu yiri:

- | | |
|---------------------------------------|---------------------|
| 1- Dabuubtiisa gabay waan ka tagay, | dihashadiisiiye |
| 2- Dubaaqayga waataan ka jaray, | waa fog dabadeede |
| 3- In kasto dalayd uga baxdoo nabar | is diidsiiso |
| 4- Dib nahaagu sheyga bartaan | waadku dayataaye |
| 5- Hadii gole dabbaal deg iyo farax | loo dalbado maalin |
| 6- Oo loo duddeeyo khalqigu | daawasho u joogo |
| 7- Uu mid aan daryeeline xakame | daamanka ugeliyo |
| 8- Uu duulin orodkuu lahaa | dalacsi sii waaya |
| 9- Oo uu cidhibta darran doorriyuu | duubo |
| madaxiisa | |
| 10- Debcin maayo oo wuxuu kabaqan | inuu kaduulaaye |
| 11- Haddaad adigu daacuun ku tahay | dooddan iyo baacin |
| 12- Gacmaha waa ka dayaa ninkii | fulmo |
| daashadaye | |
| 13- Jeeroon dareyska u gashoon | dibadda soo taago |
| 14- Daleen aniga iigama tagee | waa dig siin jiraye |
| 15- Waxaan gabayga deelka iyo laftiyo | diirka uga qaaday |
| 16- Dadka waxaan ogeysiinayaa | dawgu suu yahaye |

Arartaan timacadde wuxuu baydka 1, 15 & 16 inoogu sheegayaa u jeedada ku kaliftay tirinta gabaygaan, markuu muddo aamusnaa kadib (baydka 2). Wuxuu kale uu tilmaamay in xusuusta ay ku soo kiciyeen hal-abuur aan maanso ruug ahayn oo hortiisa gabayga ku silciyay!

(baydka 3-4) . kadibna wuxuu inoo sifeeyay siduu halabuurka ugu xeeldheer yahay (5-12) .waliba uu aad ugu dadaalo tafatirka iyo qurxinta maansadiisa (baydka 13-14). Baydka 16 waa gogolxaar kooban ee dulucda.

DULUCDA

Suugaanta Soomaalida

Dulucdu waa danta iyo fariinta maansada looga golleeyahay. Waa dooda maansadu xambaarsantahay. baydadka maansada intooda badani aalaaba dulucda ayay abaaraan, halka qaybaha kale ee qaab dhismeedka maansadu ay noqdaan baydad ama erayo kooban.

Marka dulucda iyo dooda maansadu dheertahay, sida badan hal-abuurku wuxuu ka dhigaa qaybo iskaabaya, oo qayb kastaa ay soo gudbinayso fikrad kooban oo dulucda ka mid ah.

Laba qaybood kasta oo dulucda ka mid ahna waxaa kala dhexgala dhextaalka.

Waxaana mararka qaar dhacda in halabuurku kaga hadlo laba mawduuc ama ka badan.

Marka aan u kuur galno maansooyinkii ka soo maaxday halabuurka soomaaliyeed, waxaan arkeynaa inay ka maansoodaan mawduucyo ama u jeedooyin kala duwan.

Badiba mawduucyadan dulucdu waa soo jireen halabuuradii hore laga soo gaaray, sidoo kale waxaa jira noocyo cusub oo kusoo biiray casrigaan dambe; waxaana taas ugu wacan is badalka ku yimid bulshada iyo qaabkeeda nololeed.

Noocyada dulucada ee hal-abuurka soomaaliyeed ka maansoodo waxaa kamid ah:

- 1) Amaan
- 2) Faan
- 3) Digasho
- 4) Guubaabo
- 5) Diradireyn
- 6) Cayn iyo xifaale (legaaddo)
- 7) Calaacal
- 8) Baroordiiq
- 9) Waano
- 10) Alla bari (Duco)
- 11) Kuhaan

Baryahaan dambe ujeedooyinka hal-abuurku ka maansoodo waxaa ka mid ah: siyaasadda, waxaana kordhay jaceylka iwm.

Sidoo kale waxaa jira maansooyin kale duwan oo halabuurka soomaaliyeed kaga hadlayo arrimaha ka dhacayo dunida inteeda kale.

Waanada

Suugaanta Soomaalida

Maansada waanadu waa arrin tusmaynteeda uu halabuurku ka bixiyo tilmaan wanaagsan iyo tubta ku haboon, amaba uu ka digo arrin dhibaato ama xumaani ay ka imaan karto waanadu waa caqli celin, talo iyo tusaalayn uu hal abuurku si habboon ugu sheego cidda uu waaninayo. Ismaaciil Mire waxa uu saluugay wiil uu dhalay oo cali la odhan jiray. Waxaa uu arkay cali oo aan wax tacbasho iyo shaqo midna u jeedin oo dhalinyaronimo ku mashquulsan. Ismaaciil waxa uu tiruyay gabay uu wiilka ku waaninayo inuu shaqeysto. Ismaaciil waxa uu yidhi:

1. Calliyow xasuus kugu dullee, weled xumaadaaye
2. Xaluunbaan xadiis gabay la kacay, oo xafiil tamaye
3. Dhaqashadaba ha xaalaysanine, maqal xaruuftayda
4. Cabdi iyo xuseen iyo xirsaa, kaa xusuus badane
5. Xadka qabada niman baa gudboo, soo xankaabsada'e
6. Nimanbaa xeryaha dayr kadhiga, xananka toomoode
7. Nimanbaa xijiga iibsadiyo, xabag qadhoomeede
8. Nimanbaa xafaarka u guntada, oo xabaal qoda'e
9. Nimanbaa dayuurado ku xiran, xiima samadaase
10. Nimanbaa xarago quursadoo, xaarka iibsada'e
11. Nimanbaa xaraabada gala oo, xoolo saanyada'e
12. "liiraha"ragbaa Xamar u tegay xeeb intuu maraye
13. Hablaha xuuralcaynta ah, ragbaa xeel ku guursada'e
14. Xaaji nimada nimanbaa ku tegay xad iyo laan dayre
15. Wax dhaaxaan sidkaha kuu xidhay, xaaluf iyo booge
16. Wax dhaaxaan xagaagii wan wayn, xawda kuu jaraye
17. Wax dhaaxaan sangaha xoodiyoon, kuu xabaadh ridaye
18. Kolay xaawalay tahay dad waa, xagaf sanaayaaye
19. Soddon gu'baan kuxaasaanshay iyo , waliba xaabxaabe
20. Xiniinyoolihii kula sinnaa, wakan xoogsadaye
21. Kugu xiiqay saan kuu lahaa, xaaxiyahay toose
22. Xagguun laba daarood kaqabo, hays xakabin meele

Abwaan Axmed Ow Geedi oo ku talinaya nabad ku wada noolaasho, colaadaha iyo kicintoodana ka digaya, wuxuu yiri.

- | | | |
|-----------------------|----------------------|----------------------|
| 1) Gorrow garro daa | 14) Gob colowdaa | 26) gaydha dirirtiyo |
| 2) Oo garaan daa | 15) way gummaw daa | 27) gufaacada hore |
| 3) Oo garbo cas daa | 16) Yaanay giiriyo | 28) ugeybkaa go'a |
| 4) Adna giirroow | 17) gees biciidliyo | 29) yeynaan gaabane |
| 5) Ka gu'waynide | 18) goolka naaxiyo | 30) galaydhyayntiyo |
| 6) Guuxa hoosiyo | 19) qaanka goosmine | 31) guubaabada |
| 7) Gardarada daa! | | dhiman |
| | 20) hadday gocoriyo | |
| 8) Talo gumaro ah | 21) inta garashuun | 32) gurta bidixeey |
| 9) Aan godlee qabo | 22) dareen kala galo | 33) gacantaa midig |
| 10) Aan gahadhiyo | 23) u gerqaddo | 34) waad gudboontiin |
| 11) Gaydhahayniyo | 24) gedh caddaa iyo | 35) ha garraaxine |
| 12) Maan ka guranee | 25) guutida u waca! | 36) is gar gaarsada |
| 13) Hayna diqqa qubin | | 37) oo is garabsada |

Suugaanta Soomaalida

Guubaabada

Halabuurada soomaaliyeed waxyaabaha ay ka maansoodaan waxaa kamid ah guubaabada. Guubaabadu waa hadal kulu oo saamayn iyo qiiro leh, oo loogu talagalay in dadka lagu kiciyo, dhiiggoodana lagu dhaqaajiyo, laguna booriyo inay hawl gaar ah qabtaan.

Halabuurkii soomaaliyeed ee Faarax Nuur oo dagaal ku guubaabinayaa, wuxuu yiri:

Lix halkaa ku joogtaan dagaal,	laabta ka ogaada
Luquntana hadii laydi jaro,	lugaha meermeersha
Laqantooyo kaagama tartee,	laliya duulaanka
Laarriga ha daynina wixii,	lumaya yeelkiye

Nin naftiisa guubaabinayaana wuxuu yiri:

Gaashaanka iyo labada waran,	inaan gubaa weeye
Gaaroodigaan fuulu jiray,	inaan gataa weeye
Gadhkaan xiiri guudkaan fidhoo,	gabadhnimaan sheegan
Golihii rag joogaba inaan,	garab maraa weeye!

Baroordiiq

Baroordiiqdu waa qof geeriyooday oo loo ooyo, oo baroor iyo tiiraanyo la muujiyo. Baroordiiqda waxaa lasheegaa qiimihii iyo qaayihii uu lahaa qofka geeriyooday; waxaa la tilmaamaa kaalintii mugga lahayd ee uu buuxin jiray.

Maansayahankii soomaaliyeed ee Cali Jaamac Haabiil ayaa loo soo sheegay geerida oday agtiisa qaali ka ahaa oo la oran jiray Xirsi Cilmi Geelle. Geeridaan aad buu uga naxay, deedna waxa uu tiriyay gabaygan baroordiiqda ah, isagoo ku halqabsanaya nin la yiraahdo Faarax Boowdoole; wuxuunan yiri:

Faaraxaw galgaladkaan dhigiyo, gama' la'aantayda
Gogoshaan ku jiifsaday hurdada, goodki igu raacay
Gasiinkii la ii dhigay waxaa, gawska uga daayay

Suugaanta Soomaalida

Dar guryii ka yimid baa war baas, iila soo galaye
Geeridii Xirsay sheegayeen, gacal ha waayeene
Gablamooyin waxay ii wadeen, guuldariyo hooge
Gabbal baa udumay reerihii, godanka booc yiile
Abidkii rag waa go,I jiree, tanise waa gaw'e
Lix hal oo uwada gaar ahaa, gacanayaa mooyi!

Mid weeye haddii lays galoo, geel la kala qaado
Gurmad noqanaya iyo anagu, guuto bixinaaba
Waxay golafardoddaba haddii, la isku soo gaadho
Giiryaalihii fulay markuu, gelelef rooraayo
Rogaalku giraangirin ogaa, gacanayaa mooyi!

Gar adkaatay, xaajada guracan, guurti kala maagtay
Haddii gaydka laysugu yimaad, golaha waayeelka
Waxay gola fardoodaba haddii, la isku soo gaadho
Nin waliba hadduu gees damcoo, giijo madaxiis
Wax la wada gorfeeyaba halkii, la isu geyn waayo
Gaagaabsayaa iyo isagu, gacanayaa mooyi!

Geb hadday maritidu soo tidhaa, gooru nala joogo
Godka lagu janneeyow hadduu, goosan la carraabo
Garabsaar naga weeye hadduu, gogosha soo qaado
Gasiinkii laso dhigay haddaad, gal iyo daad mooddo
Bakhayl baa gammiima e intuu, gaadhka ka qoslaayo
Godolkuu ku haasaawin jirey, gacanayaa mooyi!

Gugoo da'ay aroosyada haddii, gowda laga saaro
Shir gurmada haddii loo kiciyo, gob iyo reer aada

Suugaanta Soomaalida

Gammaan naxay heensaha haddii, guudka laga saaro
Waa gelin is daawa halkii, garangar loo joogay
Gole igu bannaanaa wallee, garab la'aaneede
Gunnaduu kasoo toocin jiray, gocanayaa mooyi!

Gardarada sokeeyaha rag baa, gees biciid u lehe
Gudcurkiyo caddadu waa walaal, kalase guul roone
Gaadiid la dhaanshuu ahaa, gibil ma diidiye
Guraduu nawada saari jiray, gocanayaa mooyi!

Alla wuxuu golxaalow ahaa, gedefka reeraaye
Magaciisu waa gudubsanaa, gaal iyo islaane
Galbeed iyo baraa laga yaqiin, gololki dheeraaye
Gashaan biruu noo ahaa, gocanayaa mooyi!

Adduunyada tan laga guurayee, gebegebbaa joogta
Ee laga galbaday meesha iyo, geeridii Maxamed
Anuun baa gubtanyoonayoo, geesigii tebaye
Gartaa u noqday Eebow majiro, garangar waartaaye
Allahayow wax badan baan gefaye, Adigu hay goyni
Oo geesta Nabigii I mari, maanta lays gurayo!!\

Digashada

Digashadu waa nooc kamid ah noocyada dulucda maansada oo halabuurada soomaaliyeed ka maansoodaan. Digashadu waa cid cajabtay ama dhibaato ku dhacday oo hadal ama wax kaloo guba loogu sii daro. Marka dhibaato ku habsato ama guuldarro la kulanto cid ay colaad ama xurgufi halabuurka kala dhaxayso, ayuu tiriyaa maanso digasho lafajebis ah, isagoo muujinaya siduu ugu riyaaqsan yahay dhibaataadaas.

Maansooyinka digashadu, tiro ahaan, kuma badna maansada soomaaliyeed. Suugaan aqoonka qaarkood waxay taas ku macneeyaan mid salka ku haysa diinta iyo dhaqanka soomaalida.waayo, dhaqan ahaan

Suugaanta Soomaalida

soomaalidu ma jecla in lagu digto cid dhibaato ku dhacday, waxayba rumaysan yihiin in qofkii cid dhibaataysan ku digta, isagana nabsigu maalintiisa haleeli doono. Sidaas darteed, waa inuu ka dhawr sadaa digashada, waliba, digashon daaye, waa inuu la qabtaa wixii uu kari karo. Dhaqankanina waa mid salka ku haya Diinta Islaamka.

Tusaalooyinka digashada

1. Markii Sayid Maxamed loo keenay madaxii koofil wuxuu tiriyay gabaygan digashada ah:

Adaa koofilow jiitayaan,
Adigaa jidkii lagugu waci,
Jahannamo la geeyow haddaad,
Nimankii jannow kacay war bay,
Jameecooyinkii iyo haddaad,
Sida eebahay kuu jaribay,
Daraawiish jakaar nagama dayn,
Ingiriis jabyoo waxa ku dhacay,
Waxay noo janjuunteenba waa,
Jigta weera bay goor barqaa
Anigana jikrey ila heleen,
Jeeniga hortisay rasaas,
Jiiraayaday ila dhaceen,
Siday kuugu jeexeen magliga,
Billaawuhu siduu kuu jarjaray,
Nafjeclaysigii baan ku idhi,
Jaljalleecadii baa wadnaha,
Jeelaaladiibaa indhuhu,
Jimic kagama helin tuugmadaan,
Kolkaan luuq idhaahdaba afkay,
Dhaaxaan jalleecaye dheg baan,
Goortaa jarreerada gafow,
Sida janannadii hore tashigu,
Taladii jinnigu ii hormaray,
Jiidaha xanuunka leh markii,
Jibaadka iga soo baxay dadkii,
Markay rubaddu jaw tidhi or bay,
Jidh kaygii bahal baa cunoo,
Jurmidiyo baruurtii dhurwaa,
Jil jiladiyo seedaha tukay,
Haddaan lays jigraareyn tolkay,
Waligood waxa lagu jaraa,
Daraawiishi waa jibindhawgiyo,

dunida joogayne
jimic la'aaneede
aakhirii jahato
jirin inshaaleeye
jawhartii aragto
mari jawaabteeda
tan iyo jeerkii dheh
jac iyo baaruud dheh
jibashadiinii dheh
nagu jiteeyen dheh
shalay jihaadkii dheh
igaga joojeen dheh
jilic afkoodii dheh
jararacdi sheego
jiirarka u muuji
jaallow iga daa dheh
jeeb kaso ruqay dheh
kor u jillaabmeen dheh
jeriyay ruuxii dheh
iga jifeeyeen dheh
jalaq la ii siin dheh
nolol ka jaan qaaday
igu jaguugnaa dheh
jaasadeed hela dheh
la igu jeeraarshay
jiifka qaban waa dheh
iga ag jiib sheen dheh
jiitay hilibkii dheh
jugux ha siiyaa dheh
igaga jaadeen dheh
laga jil roonaa dheh
jilib dgig duulaan dheh
jowga soo baxa dheh

2. Gabyaagii waynaa ee Cali Dhuux waxaa laga hayaa dhawr bayd oo uu Sayid Maxamed ku digtay markii daraawiishi jabtay. Wuxuuna yiri:
Waa lagu digtaa duul hadduu, kuu daraan jiraye
Baadduunka aw Maxamed qabo, waa ku diirsadaye
Bal dayaay, wadaadkii wakaa, sii dabayshadaye
3. Sayid Maxamed sidoo kale wuxuu ka yiri geerida qof uu necbaa oo loo sheegay:

Suugaanta Soomaalida

Najiskii gurta xumaa hadduu,
Godka lagu cadaabkii haddaan,
Uu guduri cunay waa waxay,

shalayto geeryooday
gowrac ugu jiiday
galabsanaayeene

Dhurwaagii ka giigaan u diri,
Isagay gargaaroo dugaag,
Haddaan garan gunnaan siin lahaa,

gacan salaameede
iida gooniyehe
goor iyo ayaane

Calaacal

Calaacalku waa qofka oo muujinayo dhibaato ama xanuun haya, asigoo ka cabanaya dhibaataadaas.

Gabayga “Sida koorta Yucub” ee uu curiyay Raage Ugaas, waxa uu kamid yahay maansada calaacalka ah ee ugu caansan. Wuxuu Raage gabaygaan ka tiriyay geeridii ku timid xaaskiisii uu dadka u jeclaa, oo libaax qaaday iyadoo habeen madow soo dheelmad ah.

Wuxuuna yidhi:

- | | |
|--|----------------------|
| 1- Sida koorta yucub oo la sudhay,
ah | korommo buubaal |
| 2- Ama geel ka reeb ahoo nirgaha, | laga kaxeynaayo |
| 3- Ama beelo keynaan ahoo | kor u hayaamaaya |
| 4- Ama ceel karkaarrada jebshiyo, | webi karaar dhaafay |
| 5- Ama habar kurkii iyo wadnaha, | lagaga kowsiye |
| 6- Ama kaal danley qaybsatiyo, | kur iyo dhaal yaabis |
| 7- Shinni kaaluf galay ama sidii, | koronkoroo oomi |
| 8- Xalay kaloolo aygii maladin, | kaamil reeruhuye |
| 9- kunbulkii ardaagii miyaa, | laygu kaliyeeyay? |
| 10- Wixii laygu kuunyayay miyaa,
karaamoobay? | igu |
| 11- Kunbiskii miyaa layga qubay, | kolayo ii buuxay? |
| 12- Maantana kataantii miyaa, | layga kala qaaday? |
| 13- Kob abaar ah oo dhexe miyaa,
meeray? | koore ila |
| 14- Kub miyaan ka jabay biixi aan,
haynin? | kabayo loo |
| 15- Kun iyo kow kurtood dumar haddii, laysu wada keeno | |
| 16- Kolna waxaanan helahayeen haween,
kala'e | faadumoo |

Alla Bari (Duco)

Maansada duco ama alla bari waa rabbi tuug iyo gacma hoorsi ilaahay halabuurku kaga baryo inuu kurbo ka faydo, ama kheyr uu ugu deeqo. Sida badan, maansada alla bariga ahi waxay timaadaa xillayada culays ama dhibaato ay haysato halabuurka ama bulshadoo dhan.

Cabdi Iidaan ayaa la xidhay lixdamaadkii. Waxaa Cabdi lagula taliyay inuu arji qorto oo cafis waydiisto, si loo sii daayo. Cabdise wuxuu go'aan

Suugaanta Soomaalida

ku gaadhay inuu arjigiisa ilaahay u qorto, waxaana uu tiriyay gabayga “Boqorkayow Heedheh” ee ducada ah. Wuxuuna yidhi:

Ilaahaan baahane loo baahanyow, Boqorkayow heedheh
Ilaaha waligii baaqiga noqdown, Boqorkayow heedheh
Ilaaha deeqsinimo loo baxshow, Boqorkayow heedheh
Ilaaha waaxidnima loo bartow, Boqorkayow heedheh
Ilaahaan xaq lagu beeninow, Boqorkayow heedheh
Ilaaha dunida balaaran khalqow, Boqorkayow heedheh
Ilaahii inuu burburin sheegayow, Boqorkayow heedheh

Bini Aadmi waa meel sukee, Boqorkayow heedheh
Bismillaahi waa culustahee, Boqorkayow heedheh
Ilaahii dartii lagu beryow, Boqorkayow heedheh

Kolka bacadka yoomkiyo la tago, belel qiyaamaaha
Nin kastoo badraanihi markuu, biidna rari waayo
Ilaaha xukunka kaligii bogtow, Boqorkayow heedheh

Bar janno iyo cadaabtuu khalqiga, ugu bushaareeyay
Badhba meelu geeyoba markuu, kala baqoolsiiyo
Ilaahi laba u kala baydhiyow, Boqorkayow heedheh

Bidhaantii kastaba kii arkow, Boqorkayow heedheh
Bad wax mara beriga waxa jiriyo, buura dabadooda
In bogliyo in baabaca dhigtiyo, baalka lagu duulo
Bushima nool allaha quudiyow, Boqorkayow heedheh

Biyo oday intuu iga khalqiyo, biliq yar oo dhiiga
Bilcaan dumara uurkeed intuu, igu barwaaqeeyay
Barna aniga oon qabin asoon, igu bukeysiihin

Suugaanta Soomaalida

Ilaaha nolosha igu soo baxshow, Boqorkayow heedheh

Baabaca addoon baa dhigtee, Boqorkayow heedheh

Boqolkaaga magac ee mid laan, baaqa maqashiine

Allow xadhiga sahal iiga bixi, kuu baryootamaye!

Kuhaanka

Kuhaanka ama gabaya weytinku waa maanso habaar ah oo halabuurku u jeedinayo cid gaar ah. Waxaana dhacda in habaarkaasi qofka ku dhaco

Waxaa la weriyay in nin la odhan jiray ina-weesa-xume oo aan daraawiish ahayn ay ciidan uu “Koofil” watay ay xoolo ka dheceen, dadkiisiina si xun u galeen. Dabadeed ninkaasi waxa uu tirshay gabay kuhaan ah oo uu “Koofil” ku habaarayo, waxaana gabaygiisii ka mid ahaa:

Sayidkoo wax gala raacdadoo,	la isku soo gaadhay
Adiga iyo gugniga aad wadaa,	goobtotaal noqoye
Girligaanku kaa joogsay oo,	guuxa kaa damiye
Ku googooste nimankii kufriga,	gaajaduu qabaye
Afkuna “gow” ku yidhi xaajadaad,	gees u badisaaye
Guga ha gaadhin adigaa tolkay,	gaajadaas badaye

Waa maalin xoolaha la waraabinayo, xoolo ciddii waday iyadaa shubaysa. Dadkaa xoolahooda shubayay waxaa ka mid ahaa oday da’ ah, oo joogay xilligii howsha laga nasin lahaa, waxayse dantu yeelsiisay inuu xayn adhi ah oo uu lahaa uu ceelka keeno oo shubo. Odaygii da’da ahaa ayaa wadaantii biyaha la kufay!

Markuu odaygii wadaanta la kufay ayaa wiil dhalinyaro ah oo goobta ajoogay, waa dhalinyaro iyo caadkeede, uu qosol iyo erayo kaftan ah isu raacshay!. Odaygii arintaa jeesjees iyo mid aan meesha ku jirin ayuu u qaatay, aadna wuu uga xumaaday. Wuxuu sinaba u liqi waayay in gacantuu ka mudnaa dhalinyarada goobta joogtaa ka bakhayleen, markuu itaalkiis adeegtayna wiirsi loogu daray!

Odaygii wuxuu goobta ka yidhi dhowr bayd oo geeraara, oo uu ku gabay habaarayo barbaarkii qosolka iyo erayada isu raacshay markuu wadaanta la kufay. Wuxuuna yidhi:

Roob iyo raaxaba waa

Rati xoogleh ha dhaansan

Suugaanta Soomaalida

Riyo kuuma dhalaan

Xigaalkaa haku roorin!

Waa baydad kooban, ee xambaarsan gabayaweytin xoog leh. Waxaa la sheegay intaan goobtiiba laga tegin, in ratigii uu watay wiilka barbaarka ahi intuu booday oo afarta lafdheerba ka jabay, kuna sii tuntay wiilkii watay!

Dhextaal

Qaabdhismeedka guud ee tixda soomaaliyeed waxaa ka mid ah “Dhextaal”. Dhextaalku waa baydad kala guur ah oo kala dhex gala qeybaha dulucda; wuxuuna ka koobanyahay hal bayd ama ka badan, mararka qaarkoodna wuxuuba noqon karaa erayo ama lug baydka ka mid ah. Sida badan dhextaalku wuu soo noqnoqdaa. Taasina waxay ku xirantahay dhererka maansada iyo qaybaha dulucdeeda. Dhextaalku wuxuu noqon karaa isku mid, wuuna kala duwanaan karaa tixda dhexdeeda. Gabayga gudban dhextaalkiisa hore waa (13) halka dhextaalka labaadna yahay hal bayd kali ah. Dhextaalku marar badan, sida ararta ayuu gabay ku faan isu badalaa, isagoo ujeedooyinkiisii kalena wata. Dhextaalku wuxuu ku dareensiya inay dhamaatay fikrad kamid ah dulucda, loona gudbayo fikrad kale oo dulucda ah.

Waxaa la arkaa in mararka qaar ka mid ah dhextaalku u yeelin maansadiisa; gaar ahaan, kuwooda gaagaaban, ma fikradda kooban xambaarsan. Guud ahaan dhextaalku maansada wuu bilaa, la’aantiisuna ceeb maaha

Tusaale 1:

Gabaygii “Dhankaan ka Hadlay” ee Cali dhuux ee ka tirsanaa silsiladdi Guba, waxaa dhextaal u ahaa:

	Afaartaasi waa dhaabad gabay,	iyo dhextaashiiye
jiraye	Hadal dhegaxyo waawayn ka culus,	waa dhugsiin
	Maansada dheh uun lama yiriyo,	waygu soo dhacaye
baanay	Dhudaheeda layskuma khaldee,	dhibic kalaan

Dhextaalkani wuxuu Cali dhuux u adeegsaday Gabay ku faan, sida arartii; sidoo kale wuxuu tilmaamayaa inuu dhibic kale kasoo gudbay, dhibic kalena baanayo!

Tusaale 2:

Gabaygii “Tabaalaha waqtiga” ee Xaaji Aadan Afqalooc waxaa dhextaal u ahaa hal bayd:

Suugaanta Soomaalida

Tu kaloo ka daran baa jirtee, taana bal aan
sheegto

Gabaygaan oo dheeraa, oo gaarraya ku dhawaad boqol bayd
dhextaalkaan halka bayd ahi wuxuu soo noqnoqday (12 jeer)

Carays Ciise saarkiisii “Sow kala fiicnaanmayaan” waxaa dhextaal u
ahaa:

Fa’dii kale waxaan lahaa

Halabuurada qaarkood ayaa caanku ah dhextaalladaan xarafka qaafiyada
lagu halqabsanayo, waxaana kamid ahaa Carey Ciise Kaarshe

Tusaale 3:

Heesta “Suleekha” ee M.I. hadraawi waxaa dhextaal u ah:

- 1) Suleekhaay araggaagu
- 2) Nafta wow samirsiiyoo
- 3) Sedax bay ku qadaayo
- 4) Ha ka goynin salaanta.

Isla dhextaalkaan ayaa shan jeer soo noqnoqday. Dhextaalka noocan
ahi aad buu ugu badanyahay heesaha, gaar ahaan kuwa lagu
luuqeeyo.

Heesta “Xamarey Manabadbaa” ee M.I.Hadraawi waxaa dhextaal u ah

- 1) Xuduntii dhulkaygaay
- 2) Xaruntii dalkaygaay
- 3) Xamarey manabadbaa?

Isla dhextaalkan ayaa todoba jeer soo noqnoqday.

Tusaale 4:

Gabaygii “waa duni” ee Sayid Maxamed Cabduule Xassan dhextaalladiisu
waxay ahaayeen:

1. Afartaa sifeeyoo kadhigay suufka oo kala’e
 2. Waa mawjad saylaami iyo, saacad gaw tiriye
 3. Sawd kalena waa duni dayeer, si aan kafaaleeyay
-
1. Afartaa intaan saxay miyaan siinka ka higaadshay
 2. Surmadisa lama seejiyee, surin ma qaadsiiyay
 3. Meeshaan ku kala sooci jiray soohdin mow mariyay

Dhextaalkaan Sayidku wuxuu ku tilmaamay inuu fikradii hore sifican u
cadeeyo, (afartaa sifeeyoo...), wuxuuna sheegay inuu fikrad kale u
gudbayo (sawd kalena....).

Dhinaca kale dhextaalkaan tirada waa isaga mid, laakiin waa baydad kala
duwan.

Suugaanta Soomaalida

Tusaale 5:

Gabaygii dheeraa ee Sayid Maxamed cabdulle Xasan ee “Gudban” dhextaaladiisa waxay ahaayeen:

1. Afartaa geddii aan bartiyo, gololo’daydii dheh
2. Gerbidaan kasoo hoorin jiray, godol naqaygii dheh
3. Madfac gaw yiraahdiyo rasaass, gininigtoodii dheh
4. Guullaamo roob da’ahayiyo, gababaxdiisii dhe
5. Onkod kuguguguclayniyo hillaac, galalacdoodii dheh
6. Gufaaciyo gudgude soo curtiyo, garama hoodii dheh
7. Guluuliciyo mayaay laysku daray, galangalkood kii dheh
8. Gal xareeda daad soo garbaday, gal iyo duufaan dheh
9. Bad gariirtay mawjado gurmamay, gacamadii ayl dheh
10. Shir la gooday waayeel gab yiri, garangartiisii dheh
11. Xariir lagu gimaamadahayiyo, gola firaasheed dheh
12. Xaajada ninkii garanayiyo, gig iyo sheegeed dheh
13. Gobo kalena waa aniga iyo, ged iska sheegayga

1. Afartaa gudbaye balaan mid kale, soo gadaal celiyo

U firso dhextaalka mid waa (13)bayd, midna waa hal bayd kali ah. Mid kastaana waxaa innuu sheegayaa in fikradii hore dhammatay, tukalena loo gudbayo. Dhextaalka hore ee Sayidku, sidii ararta, ayuu tixdiisa iyo doodiisaba qiimaheeda noogu sheegay!

Tusaale 6:

Gabaygii “Durdur” ee M.I.Hadraawi dhextaaladiisu waxay ahaayeen sidaan:

1. Afartaa daleeyaye, waxaan dib ugu soo laabtay
2. Toban iga dardaaran hadduu, hadal wax daaweyne
3. Ninka caawa loo dadab dhigaw, maqal dabuubtayda
4. Digtoorkaan u maah maahayow, hadalku yuu duulin
1. Afartaa daleeyaye waxaan dib ugu soo laabtay
2. Toban iga digniinaan ninkii, dagan ogeysiine
3. Ninka caawa loo dadab dhigaw, maqal dabuubtayda
4. Diktoorkaan u maah maahayow, hadalku yuu duulin
1. Afartaa daleeyaye waxaan dib ugu soo laabtay
2. Toban uu dalkii sheegtayuu, daw u leeyahaye
3. Ninka caawa loo dadab dhigaw, maqal dabuubtayda

Suugaanta Soomaalida

4. Diktoorkaan u maah maahayow, hadalku yuu duulin

1. Afartaa daleeyaye waxaan dib ugu soo laabtay
2. Toban uu dadweynuhu I yidhi, duqayda gaadhsiiye
3. Ninka caawa loo dadab dhigaw, maqal dabuubtayda
4. Diktoorkaan u maah maahayow, hadalku yuu duulin

1. Afartaa daleeyaye waxaan dib ugu soo laabtay
2. Toban uu darwiishkii I yidhi, duqayda gaarsiiye
3. Ninka caawa loo dadab dhigaw, maqal dabuubtayda
4. Diktoorkaan u maah maahayow, hadalku yuu duulin

1. Afartaa daleeyaye waxaan dib ugu soo laabtay
2. Waa toban dastuur towriyoo, deel ku wada yaale
3. Ninka caawa loo dadab dhigaw, maqal dabuubtayda
4. Diktoorkaan u maah maahayow, hadalku yuu duulin

1. Afartaa daleeyaye waxaan dib ugu soo laabtay
2. Toban ay dikriidiinu tidhi, sii diktoorada'e
3. Ninka caawa loo dadab dhigaw, maqal dabuubtayda
4. Diktoorkaan u maah maahayow, hadalku yuu duulin

Tusaale 7:

Gabaygii “Geela igu siiya” ee Cali Dhuux waxaa dhaxtaal u ahaa lugta danbeedka, dhextaalkani wuxuu soo noqnoqday toban jeer, isagoo lugta horaadku shan mar kala duwaneyd, shanta mar ee kalana isku mid ahayd. Waana kan dhaxtaalkani:

1. Iyadana ha garan waayinee, geela igu siiya
2. Hal gabbaday nin uun baa gartee, geela igu siiya
3. Iyadana geeridaynay tabciye, geela igu siiya
4. Iyadana ha garan waayinee, geela igu siiya
5. Iyadana ha garan waayinee, geela igu siiya
6. Iyadana ha garan waayinee, geela igu siiya
7. Nimay gabadhi keentaan ahee, geela igu siiya
8. Intaan gaarin gawgii ilaal, geela igu siiya
9. Iyadana ha garan waayinee, geela igu siiya
10. Waxba haddaydaan igu gubayn, geela igu siiya

Dhextaalada (1,4,5,6 &9) baydka dhaxtaalku waa isku mid horaadkiisa iyo danbeedkiisuba; halka dhextaalada (2,3,7,8&10) uu danbaydka baydka kali ah isku mid yahay, horaadkana ku kala duwan yihiin. Dhextaalka nuuca lugta danbeedka kali ahi soo noqnoqdana maansada soomaaliyeed way adeegsataa.

GUNAANAD

Gunaanadku waa erayada ama baydadka uu halabuurku maansada ku soo ebyo, ku sagootiyo dhegaysta yaashiisa ama akhristayaashiisa.

Suugaanta Soomaalida

Gunaanadka wanaagsani waa inuu xariir la leeyahay dulucda, koobanyahay isla markaasna tayadiisa suugaaneed sarayso, si uu saamayn xoogan u yeesho.

Gunaanadka tayaysani badiba xasuusta ayuu ku raagaa waayoo muddo kadib aalaa maansada badideedu way ka baxdaa xusuusta dadwaynaha, waxaana ku hara baydad kooban oo saamayn xoogan leh, amaba murti iyo xikmad laysu tebiyo isu roga. Gunaanadka tayaysani intaa yar ee haraysa ayuu aalaaba galaa.

Gunaanadku lamahuraan uma aha maansada sidaa darteed, waxaa la arkaa in halabuurku aanu gebagebu u yeelin maansadiisa, gaar ahaan kuwa gaagaaban.

Guud ahaan gunaanadku wuu bilaa maansada, la'aantiisuse ceeb maaha.

Tusaalooyin

Sayid Maxamed cabdille Xasan wuxuu gabaygiisii “Waa duni” ku soo ebyay fariintaan uu dhegaystayaashiisa u tebinyo::

Hadalkaa sagta aan ku xiray,	sadarka laabtayda
Intii gabay su'aashiis qabtay,	saxa kalaankayga
Sowdkaasna dulkaan kuwado,	siinka ka higaadsha

Gabaygiisii “saha kacay” ee Sayid Maxamed, gunaanadkiisu wuxuu ahaa baydkan dulucda ah:

Eebow salaamey anaan	sadarka weydaaran
Maruun baan sur suuraha ka bixi,	saymahaan galaye
Eebow naflii kale sugaye,	adigu hay soocin

Gabaygii “Durdur” ee M.I.Hadraawi, wuxuu ku soo gunaanaday dardaaran gaaban oo uu dulucdii waanada ahayd did u xasuusinayo:

Intaasoo hal oo dood ahiyo,	fallo daba joogta
Oon daleel ka wada sheegay baan,	daacad kuu Idhiye
Waanada hadiidina, rag waa,	lala dardaarmaaye

Xaaji Aadan Afqalooc maansadiisii “Tabaalaha Wakhtiga” ee uu tiriyay xilligii dowladda rayidka, wuxuu kaga hadlay dhaliilaha iyo gaabiska uu xilligaas dareemayay. Wuxuuna maansadaas oo dheereed ku soo gebagebeeyay gunaanadkaan qeexaya ujeedada dhabta ah ee uu dulucda kalahaa:

Anoon boogta wada taabanoo,	idin tusaaleyay
Oo aan tabiih iyo islaax,	taana uga jeedo

Suugaanta Soomaalida

Waa taaraan boostawgu ride, soobbe how tago e

HUMAAG

Humaagu (Imagery) waa sawir maskaxeed ay suugaantu soo gudbinayso. Halabuurku wuxuu adeegsadaa erayo ama tibaaxo dareen ku beeraya dareemayaasha shanta ah ee qofka: aragga, maqalka, taabashada, dhadhanka, iyo urinta. Humaagu wuxuu sare u qaadaa farshaxannimada, qiimaha iyo tayada suugaanta. Suugaanta humaaga ka madhani dareen la sheego ma reebto. Abwaana inta uu ka farshaxan iyo halabuur badan yahay ayuu humaagga ka abuuri ogyahay.

Humaaggu waxa uu kamid yahay qalabka loo adeegsado qurxinta iyo xoojinta farshaxannimada faneed ee suugaanta, tix iyo tiraab miday tahaba.

Abwaan Cabdi Qeys si uu inoo dareensiyo dhibaataada dhallaanka heysata wuxuu tiriyay hees “ Hadhibin hooyadaa ee soo dhalo”, oo ay kamid ahaayeen baydadkaan:

Hadhibin hooyadaa ee soo dhalo

Meel dhallaanka lagu dilo

Ku dhalan maayo

Meel aan cid I dhowreyn

Ku dhalan maayo!

Soo dhalo hooyo!

Dhiiga iyo colaadaha

Ku dhalan maayo

Dagaallada dhexdiinaa

Ku dhalan maayo!

Soo dhalo hooyo!

Dhalan maayo

Anigu dhalanteed

Ku dhalan maayo!

Habeenkii wuu dhaqaaqay

Suugaanta Soomaalida

Sedkaagiina wuu dhamaaday
Dhexdeediyo feedhaheeda
Haddaad soo dhaafiweydo
Culayskaagaa dhibaayo
Dhimasho kama baaqsaneysee
Dhamow waxaa nala wanaagsan
Inay dhaqso kala timaade
Ha dhibin hooyadaaye soo dhalo!
Meel dhalaanka lagu dilo
Ku dhalan maayo
Meel aan cidi ii dhaweyn
Ku dhalan maayo!
Soo dhalo hooyo!

Abwaanku wuxuu ka shaqaysiiyay dareenkeena maqalka. Wuxuu inoo abuuray humaaga ilmihii uurka ku jiray, iyo umilisadii oo dood dhex mareyso, erayadii ay is weydaarsanayeen ayuu inoo soo gudbiyay. Wuxuu inoo sheegtay hadallo la maqli karo!.

Abwaan kale wuxuu ka adeejiyay dareenka urta wuxuuna yidhi:

Arooryada hore daruur onkodiyo
Ufada roobku way ugoobtahaye.

Abwaan kale wuxuu ka adeejiyay dareenka taabasha wuxuuna yidhi:

Ma anaa intaan fuud kabado, kor uga soo booda!
Dabnahayga ma anaa kulayl, kow isaga siiya!!

Axmed Saleebaan wuxuu inoo soo gudbiyay Haldhaa ay Gabadhu u egtahay, wuxuuna yidhi:

Sida gora haldhaayoo
Goor hore aroornimo
Gegi doogle iyo rays

Suugaanta Soomaalida

Goob wacan ka soo kacay

Oo gedefka baalkiyo

Gilgilaaya waaxyaha

Oo gudub tallaabada

Miyir u gundinayoo

Xarrago u gurayaa

Abwaanku wuxuu inoo sawiray muuqaalo taxane ah, sida filimka, ee goray Goray hadhaa, isagoo dareenkeena araga ka adeejinaya.

Wuxuu inoo sheegay muuqaalo la arki karo!

Abwaan kale oo gabadh amaanaya wuxuu yidhi:

Sidoo cir ku hooray meel cosobloo

Cadceedii u soo baxdaa tahay!

Erayadaani sawir ayay maskaxdeena ku abuurayaan. Sawirkaasi ayaa “Humaag” loo yaqaan

AFKA MALDAHAN

Afka maldahan (Figurative Language) waa nooc kamid ah hadalka, aalaaba waxaa lagu adeegsadaa suugaanta. Afka maldahan wuxuu ku duwan yahay afka qayaxan (Literal Language). Afka maldahani waa hadalka oo la daboolay, oo loola jeedo macna ka duwan macnihiisa caadiga ah. Tani farshaxan iyo qurxin ayay hadalka siisaa, dulucdiisana waxay ka dhigtaa mid qotodheer oo dhaxal gal ah.

Marka la adeegsado afka qayaxan, macnaha erayada ee qayaxan ayaa loo jeedaa, macne dahsoon oo ay xambaarsanyihiin ma jiro. Marka la yiraa “*Cali waa geesi*”; erayadaani waxay inoo sheegayaan oo kaliya in Cali yahay nin Geesi ah, oo aan fulay ahayn. Hadalka caadiga ah ee lagu hadlo afka qayaxan ayaa ku badan.

Afka maldahani wuxuu ka duwan yahay kan qayaxan. Marka afmaldahan lagu hadlo waxaa loo jeedaa macne dadban ama maldahan. Marka layiraa “*Cali waa Libaax*” marna looma jeedo in Cali oo dad ahi yahay Libaax oo dugaag ah! Waxaa loo jeedaa in cali yahay nin Geesi ah. Waxaa la adeegsaday afmaldahan si macnaha loo soo gudbiyo. Suugaanta, tix iyo tiraabba, waxaa aad loogu adeegsadaa afka maldahan.

Humaagu waxa uu kamid yahay qalabka loo adeegsado qurxinta iyo xoojinta farshaxannimada faneed ee suugaanta, tix iyo tiraab midey tahaba.

Suugaanta Soomaalida

Bal u firso tusaalayaashan. Heesta “Hooyo” ee Hadraawi Waxaa kamid ahaa:

Hooyooy la’aantaa
Adduunyadu hubaashii
Habeen kama baxdeenoo
Iftiin lama heleenoo

Maaansadii “Kaana siib, Kanna saar” ee abwaan Timacadde wuxuu calnka ku sheegay:

Saqdhaxaanu ahayne
Kii soo saaray cadceedow

Xaaji Aadan Afqalooc dhibaataada qaadka uu ku sheegay waxaa kamid ahaa:

Maxaa doobab qara weyn lahaa, qalin ka dhuubnaaday?

Hadraawi habeen iyo iftiin kama hadlayo; tima caddana saqdhaxe iyo cadceed midna kama hadlayo; qof dhalin yaro oo qalin ka dhuubmana lama arag lamana maqal! Intuba waa afmaldahan oo wax kale ayaa loo jeedaa.

Adeegsiga afka maldahani wuxuu hadalka dhaxal siiyaa qottodheeri, qurux iyo xiise, dhagaystuhu kama daalayo dhageysigeeda, akhristuhuna kama daalayo akhriskeeda. Waxaa kale ee uu kaabaa in si xooggan oo tayo leh loo soo gudbiyo fikradda ama dareenka suugaanta xambaarsantahay. Suugaantuna, sideedaba, waxay hadalka caadiga ah dheer tahay qotodheeri, qurux iyo hannaan dhaxalsiiya qiime iyo soo jiidasho.

Noocyada afka maldahan

Afka maldahani wuxuu leeyahay noocyo kala duwan, waxaan kamid ah:

- 1- Tashbiiha ma ekeeyaha (simile)
- 2- Shareeraha ama isticaro (metaphor)
- 3- Qofeynta (personification)
- 4- Buunbuuninta (hyperbole)
- 5- Sarbeebta (Allegory)

Ekeeye ama tashbiih waa in la is barbardhigo laba shey oo midkood midka kale ayuu u egyahay la yiraahdo; sida, “Cali waa libaax oo kale”. Libaaxu waa geesi, sidaa darteed ayaa cali loo barbardhigay libaaxa oo uu geesinimada kala midyahay. Tashbiihu wuxuu adeegsadaa erayada “Sida” “oo kale” “U eg yahay” iwm. U firso tixdaan:

Suugaanta Soomaalida

Raage Ugaas oo Calaacalaya wuxuu yidhi:

Sida koorta yucub loo sudhay, korommo buubaala

...

Xalay kaloolo aygii ma ladin kaamil reeruhuye

Axmed Saleebaan Bide oo gabdh sifaynay wuxuu yidhi:

Sida geed caleenloo	Oo godan barwaaqo ah,
Ubax guudka qariyeen	Durdur aan go'ayn iyo
Ay gooni laamaha	Gacan webi ku yaalaa
Ay mid waliba geesteed	Oo gu' iyo jiilaal
Hoobaan is gaadhiyo	Midab guurin baa too
Guntin miro ah leedahay	Gabadhyahay kalgacal baad
Oo soo gandoodoo	Goortaan ku eegaba
Galka faraaqo soo daray	Qalbigayga gelisaa!

Sawir guud ayuu abwaanku sifeeyay, sawrikaas guud ayuu gabadhii uu jeclaa kala mid dhigay. Waa tashbiih ama ekeeye humaag ama sawir lagu dhisay.

Shareere, (Isticaaro) waa laba shay oo lays barbardhigayo, markaasna lama adeegsanayo "sida" "oo kale" "u egyahay" iwm waxaa la sheegayaa in labada shay ay yihiin; "cali waa libaax" tashbiiha waxaa la odhanayaa X waxay u egtahay Y, laakiin shareeraha waxaa la odhanayaa X waa Y. tashbiiha Cali Libaax buu u ekaa, shareerahase isagii baa libaax ah! Halkaas waxaa ka muuqda in shareeruhu ka xeeldheeryahay tashbiiha ama ekeeyaha.

Timacadde calanka wuxuu ka dhigay roob da'ay: seerma waydo hillaacdayow

Sagal maanta daroorayoo

Siigadii naga maydhayoo

Gabadh wiil amaanaysaana waxay ka dhigtay dayax afariyotobnaad:

Afar iyo tobanaad iyo

Dayaxii adduunkow!

Suugaanta Soomaalida

Qofayn waa in wax aan qof ahayn loola dhaqmo sidii isagoo qof ah. Xayawaanka manoolaha, fikradaha iwm ayaa halabuurku siinayaa sifooyinkii qofka, sida ayaga oo lala hadlo ama hadlayo iwm.

Bal u firso gabaygaan Cali Xuseen Xirsi qaybtaan kamid ah:

Fiinyahay adaa ololayoo, oohin ciirsadaye

Haddii aan lagu imaanin waad, aamusi lahayde

Maxaad aragtay waan kula qabaa, uur ku taalada'e?!

Waxay tidhi ilaahay haddaad, aad u garanayso

Oo aad islaam tahay idaa, waan irdhaysanahaye

Waxaan idhi qofkii I ahbiyaa, wuu amaan heliye

Ashahaada iyo waan aqaan, aayaddii nabiye

Ha yeeshee ilmada kaa dhacdiyo, umalka guudkaaga

In yar iiga sheeg waxaan rabaa, inaan ogaadaaye

Waxay tidhi inkaarbuu ku go'ay odaygi soomaale!

Gabaygan oo aan qayb yar kasoo qaadanay abwaan Cali Xuseen Shimbirta Fiinta (Galow ama Dhebed) ayuu qof ka dhigay, deedna lasheekaystay, oo dhibaataadii isticmaarka iyo talo xumida soomaalida murugteeda qaybsadeen. Waa qofeyn aad u xeeldheer.

Abwaan kale ayaa yiri: waraabaha ciyyaayow adaan, kuu waramayaaye

Mid kalena wuxuu yiri: guuguulihiiyow haddaad guga u oynayso

Mid kalena wuxuu yiri: gorow garrodaa

Oo garaan daa

Oo garbacas daa

Adna giirrooy

Ka gu'waynide

Guuxa hoosiyo

Gar darada daa!

Mar kalana wuxuu yiri: Baddaa oydoon na tiri

Baaruud nugliyeerihiyo

Hadhaaga is biirsadiyo

Beley igu aasayaan!

Suugaanta Soomaalida

Abwaanadu waxay la hadleen waraabe guuguule iyo riyo, farriintii ay wadeena xayawaandaas ayay u jeediyeen. Xayawaankiibay ka dhigeen dad ay la had layaan! Abwaanka kalena baddii oo calaalaysa ayuu noo soo gudbiyay. Wuxuuna ka dhigay qof inala hadlaya. Cali Xuseen isagu, Fiintii ayuuba la sheekaystay, oo dood iyo is waraysi dhaxmaray. Habkaan waxa loo yaqaan qofayn.

Buunbuunin waa in halabuurku ka badbadiyo arinta uu sheegaayo. Bal u fiirso tixahaan:

Afqalooc wuxuu yiri: maxaa doobab qararaweyn lahaa qalin ka dhuubnaaday?

Raage Ugaasne wuxuu yiri: xalay kololo'aygii ma ladin kaamil reeruhuye

Sayid Maxamedne wuxuu yiri: jibaadka iga soo baxay dadkii, jiifka qaban waa dheh

...

Haddaan lays jikraarayn tolkay, laga jil roonaa dheh

Waligood waxaa lagu jaraa, jilib dhig duulaan dheh

Axmed S. Bidena wuxuu yiri: gabaryahay kalgacalbaad

Goortaan ku eegaba

Qalbigayga gelisaa

Waa la dhuubnaadaa, laakiin qof qalin ka dhuubani majiro! Waa dhici kartaa inuu Raage taahay, laakiin marn taahaasi mayeelanayo cod deegaanka oo dhan laga maqlo; sidoo kale, waa dhici kartaa in taahiisa cid garab huruday maqlaysay, laakiin reeraha oo dhan marna lagama maqlayn. Koofil markuu dhimanayay inuu qayliyay waa u badantahay laakiin qayladii kabaxaysay lalama hurdi waayin! Dagaaladii daraawiish iyo ingiriis dhaxmarana mar kasta ingiriiska lama jebin jirin! Axmedn mar kasta oo gebedha fiiriyo jacayl masii qaadayn! Doobab badan qaadku wuu caateeyay, Raage waa la arkaa inuu taahay lana maqlay Koofilne waa la arkaa inuu qayliyay markii ladilay; ingiriisna dagaalo daraawiishtu waa ku jebiyeen, Axmadna eegmo jacayl way ku reebi kartaa... hadana halabuuradu ka badbadin xoog ah ayay arimahaas ku sameeyeen, waxaan loo yaqaan **buunbuunin**. Buunbuunintu qota dheeri iyo qiima faneed ayay tixahaas siisay!

Buunbuunintu waxay xoojinaysa fariinta iyo hummaaga maansada ay soo gudbinayso, fariinta maansadane tayo iyo saamayn qota dheer ayay u yeeshaa

SARBEEB

Sarbeeb waa hadal daboolan oo duluc kale ay ku dhex qarsoon tahay. Waa hadalka maldahan ee sida cad loo sheegin. Sarbeebtu tixda iyo

Suugaanta Soomaalida

tiraabta labdaba way ku timaadaa. Sarbeebtu waxay suugaanta huwisaa qurux iyo qiimo gaar ah. Waxayna ka dhigtaa mid aan laga xiiso go'ayn, mar kastana loo hiloobo dhagaysigeeda iyo akhriskeeda. Waxayna kamid tahay qalabka ugu caansan ee hadalka lagu qurxiyo. quruxda faneed kasukow waxaa loo sarbeebtaa dhawr sabababood, sida sarriigta, cabsida, hoga tusaalaynta, halxiraalaha iwm.

Aan soo qaadano dhawr tusaale oo sarbeeb ah, tix iyo tiraabba.

Qammaan iyo seedigiis

Waxaa la yiri Qammaan bulxan ayaa saluugay gaaranimada gabar uu guursaday. Maalintii danbe ayaa seedigiis oo xoola doon ahi u yimid. Qammaan wuxuu goostay inu seedigiis u sheego sida ayna walaashiis qurux maanahane qiimo kale loogu arag! Maadaama aan arintaan oo kale, dhaqan ahaan afka lagu ballari karin, ayaa asagoo sarbeebta adeegsanaya wuxuu yiri:

Baal gorayo waa lagu ogaa, inuu bidhaamaaye

Berbera maalintuu tegay waxaa, bi'iyay miisaane

Bir kolay ku tahay shayga fudu, beesad lagu waayay

Boos waxaan jeclaadaba markaan, baayacaan nacaye!

Qammaan firiintiisii wuu gudbiyay iyadoo maldahan. Wuxuu ka hadlay baal goroyo, dulucda dhabta ah ee loo jeedaana ay gabadha tahay. Shakina maleh in seedigu farriinta si fiican u fahmay. Adeegsiga sarbeebtu wuxuu maansadaan huwiya qurux faneed iyo dhaqan wanaag

Saahid Qammaan & feytin

Saahid Qammaan wuxuu guursaday gabar ay isku hayb yihiin Feytin Maxamuud. Sahhid wuu saluugay gabadhii markuu guursaday kadib oo wuxuu u arkay inay basari ama areebo tahay. Saahid waxay la noqotay inuu dhaliishaan Feytin u sheegto, kana codsado in gabadh kale loogu badelo! Saahid iyo Feytin ayaa maalintii danbe shax isugu yimid. Shaxda tusheedii ayay tixahaan Saahid iyo Feytin isku dhaafsadeen. Saahid wuxuu yiri:

Gammaankiina badan Feytinow, gobalba waa cayne

Qaarbaan garmaamada la barin, gaalibna aqoone

Qaarbaan kagoor iyo kagoor, godolka daynayne

Gabxa lagu shakaalyoow sanguhu, gaabi orodkiiye

Gacalnimo haddad naga rabtaan, go'aha noo doorsha

Haddii kale sidaad noo gasheen, yaa I noo godoba

Suugaanta Soomaalida

Feytin cabashasa seedigiis Qammaan kama garaabin, wuxuuna u arkay in eeda uu Saahid leeyahay, oo gabadhu waa yartahaye isagu ka gaabiyay tababar iyo dulqaad ay ka mudnayd. Wuxuuna Feytin yiri:

Hal garawsho leey saahidow, gobi la yeedhaaye

Waa gu' iyo laba dayr jir aan, fuulmadeed geline

Nin gammaan yaqaan dhal waa, gaasa bixiyaaye

Haddii nadigu gubo neef yar, waa jara gariiraaye

Waa taa gankeedii guryaha loogu caws guriye

Maxaad nagu galaysaa, haddaad fuuli garan wayday?

Labada abwaan si dahsoon oo xanaf lahan ayay farriintooda isku dhaafsadeen iyagoo kawada hadlaya arin aan afka lagu ballaarin karin

Balligu waa buuxaa bishuna waa soddon

Waxa la yiri beri ayaa wiil cilmi doontay, oo meel deegaankooda ka baxsane ugu xeraystay. Muddo wuxuu cilmiga raacdaba, beryihii danbe ayaa waayuhu ku adkaadeen. Asagoo xaaladu ku qallafsantahay ayaa socoto reerkooda u socota soo martay. Deedna farriin ayuu aabihiis u faray, wuxuuna socotadii ku yiri “waxaad aabahay ku tiraahdaan: wiil kaagii wuxuu ku soo yiri, shanta salaadood wayso kaliya ayaan ku wada tukadaa”

Socotadii markii ay adoogii u tageen, waxay u sheegeen farriintii wiilku u soo faray. Odaygu wuxuu gartay in wiilkiisa waayuhu ku adagyihiin.

Maalin danbe ayaa odaygii waxaa soo maray socoto u jeeda meesha wiilkiisu u xaraystay.

Odaygii wuxuu socotadii u soo dhiibay qunbe subag ah iyo soddon cad oo hilib duban ah, kuna yiri intaan wiilkaygii u geeya, waxaadne ku tiraahdaan aabahaa wuxuu ku soo yiri “balligu waa buuxaa bishuna waa soddon”

Socotadii intay dhaxda ku soo jireen ayaa hunguri ka galay hilibkii iyo subagii ay sideen, waxna waaba ka taabteen! Markii ay wiilkii gaareen waxay u geeyeen saadkii aabihiis u soo dhiibay, waxay u sheegeen farriintii uu soo faray. Markuu wiilkii amaanadii gudoomay, farriintiina dhegaystay ayuu ayagii ku jeestay oo yiri: “war nimanyahow, aabahay wuxuu ii soo sheegay in hilibku soddon cad yahay, qunbaha subaguna buuxo; idina waxaad ii keenteen hilbo iyo subag dhimane, sidee wax u jiraan?!”

Sheekadaan wiilka iyo aabihiisba waxay adeegsadeen sarbeebta. Wiilku wuxuu farriintiisa ku dhisay salaad iyo wayso, wuxuuse dhab ahaan ka hadlayaa waayaha haysta. aabuhu wuxuu doodiisa ku dhisay balli biyo ku

Suugaanta Soomaalida

jiraan iyo taariikhda bisha; wuxuuse dhab ahaan u jeeday hilibaha iyo subaga uu wiilkiisa u soo diray

HALXIRAALAH

Halxiraaluhu waa qayb kamid ah sarbeebta, waa tilmaan lagu bixiyo wax bulshada dhexdeeda laga yaqaan, lana rabo in qof loo sheegayaa garto. Halxiraaluhu waa xujo noqda tix ama tiraab, waxaana loo adeegsadaa si halabuurku u sugo inuu ka aragti iyo aftahannimo badanyahay qofka uu halxiraalaha u soo jeedinayo. Haddii qof la xujeeyay xalxiraalaha furi waayana waxaa cadaanaysa in laga adkaaday.

Waxaa kale oo halxiraalaha loo adeegsadaa si loo sharibo heerka garaadka iyo kasmaha qof kale. Ujeedadaan waxa aad u adeegsan jiray gabdhaha iyo wiilashada guur doonka ah. Midba midka kale ayuu halxiraale usoo jeedin jiray; haddii uu furana u arki jiray qof gayaankiisa ah oo ay isu qalmaan, hadduu furi waayana, waxaa dhici karay, inay halkaas ku kala tagaan.

Xalxiraalaha tixda ah halabuur soomaaliyeed oo Xaaji Gooni la oran jiray ayaa Sayid Maxamed usoo diray Gabay halxiraale ah, oo ay ka mid ahaayeen baydadkaani:

Weel caanihii laga dhamee, canugu heemaarshay
Oo cidda loo dhigay afkii, laga cashaynaaye
Oo dhayi caaddaa ka tahay, waa cajabe sheega!
Ceesaamo kuu dhalahayaan, dhiilo loo culanin
Oo naaso cayntood lahayn, waa cajabe sheega!

Sayid Maxamed cabdulle xasan markii gabaygaa halxiraalaha ah loo keenay, gabay kale oo isla qaafiyaddii ku socda ayuu kaga jawaabay, waliba halxiraalayaal cusub usii raaciyay. Labadii qodob ee kore jawaabtoodii waa tan:

Weel caanihii laga dhamee, canugu heemaarshay
Oo cidda loo dhigay afkii, laga cashaynaaye
Oo dhaayi caaddaa ka tahay, waa cajabe ilahe!
cid haddaad u baantee na tiri, caraye yaa sheega
candho weeye oo waa naqaan, caynka ay tahaye
adse haddaad ciin tahay maxaa, canugu kaa

dheefi?!

Ceesaamo kuu dhalanhayoon, dhiilo loo culanin
Oo dhaay casuus iyo garoor, carafle waayaynin

Suugaanta Soomaalida

Oo naaso coobbaa lahayn waa cod aan jirine
Caynkaa waxaad mooday waa, calafki beereede
Ebedkood riyo caata ay, guni cisaysaaye
War ceesaan ma weytahay maxaa, calaga kaa
yeelay?!!

Dhanka tiraabta, waxaa soomaalidu wariyaan sheekooyin halxiraale
huwan waxaa kamid ah sheekada **Kabacalaf**.

Waxaa la yiri waxaa jiri jiray laba wiil oo walaalo ah, midkood ilaahay
waxa uu u hibeeyay qurux iyo bilic samaan, masa garaad badnayn, kan
kalena wuxuu ahaa nin aad u caqli badan laakinse foolxume aduun ku
aruurtay! Kan garaad badnida iyo foolxumida kulansaday waxaa la oran
jiray Kabacalaf.

Wiilkii quruxda ilaahay u hibeeyay ee kaba calf walaalo ahaayeen ayaa
gabadh la baxay oo u masaafeystay xagga iyo degmo uu joogay wadaad
wax mehriya. Wiilkaan gabadha la baxay wuxuu jeclaystay inuu
walaalkiis kabacalaf raaco oo uu u sii wehel yeelo. Gabadhii lala soo
baxay waxay goosatay bal inay sharibto garaadka ninkaan sayigeeda
noqon doona, isagana hubiso garaadkiisa intaan loo mahrin! Waxay
habeenkii oo dhan guureeyaanba, markii waagii baryay ayay gabadhii
tidhi “*War maan hamuun tirano?*” wiilkii ayaa yaabay oo yiri: “oo
maxaan ku hamuun tiranaa ee aan sidanaa?” kabacalaf ayaa soo kala
dhaxgalay oo yiri : “*walaal gabadhu waxay u jeedaa aan
rumaysanno!*”.

Markii ay in cabaar ah socdeen, ee ay daaleen ayay geed harkiis
fariisteen. Gabadhii ayaa ku jeesatay wiilkii ay is wateen oo ku tidhi “*war
maan nasano?!*”. Wiilkii guur doonka ahaa ayaa hadalkii gabadha
layaabay oo yiri: “*Sow innagaan fadhina*, nasashada kale ee inoo laaban
waa maxay?!” kabacalaf ayaa intuu walaalkiis ku jeestay ku yiri: “*walaal,
waxay u jeedaa aanu kabaha iska bixino*”

Nasasho cabaar ah kadib waxay sii wateen socodkii. Markii ay xoogaa
socdeenba gabadhii ayaa tiri: “*Cidbaan arkka*”. Aragtida ruux banii
aadam ahina qiimo gaar ah ayay u lahayd, waayoo ilaa xalay ayayna wax
dad ah isha saarin. Caawana cid ay u hoydaan inay helaan aad bay ugu
baahnaayeen. Barbaarkii guurdoonka ahaa ayaa hareeraha eegay, cid uu
arko daaye raadkeedna uma muuqan. Wuu yaabay uu fajacan, oo is
weydiiday waxa gabadhu beenta ku faleysa!! Hadduu cabbuur is celiyay
intuu gabadhii u jeestay si qallafsan u yidhi: “*naa meeday cidda aad
sheegeysaa, annagu waxba ma aragno e?!*” kabacalaf ayaa haddanaa soo
kala dhaxgalay, oo isagoo walaalkiis qaboojinayana ku yiri: “*walaal
gabadhu waxay aragtay tuke, meeshii tuke lagu arkana cidbaa ka
dhow!*”. Hadday cabaar socdeenba sida ay gabadhu tilmaamtay ayay
noqotay, oo waxay ku soo baxeen cid meel degan. Habeenkaasna hoy iyo
wehel, iyo dhuuni iyo dheefba halkaas ayay ka heleen.

Suugaanta Soomaalida

Markuu waagii baryay socodkoodii ayay sii wateen. Muddo kadibna waxay ku soo baxeen wadaadka wax mehriyaa joogay waxay ahayd degmo dhismo iyo dhaqdhaqaaq badani ka muuqdo. Waxay dhismayaasha iyo dadka degmada isha la raacaanba gabadhii ayaa barbaarkii guur doonka kusoo jeesatay oo waydiisay: *“horta magaaladu ma disantahay, mise waa dunsantahay?!”* barbaarkii ayaa yaab iyo aamus isku daray, magaalo dhisan oo ay indhaheeda ku aragto ayay iyagii dib u waydiisaa inay dhisan tahay iyo in kale! Tolow, gabadha ma waxbaa u dhiman!! Wax uu gabadha yiraahdana wuuba garan waayay kabacalaf ayaa dareemay walaalkiisa isku buuqsan iyo gabadha jawaabta ka sugaysa! Intuu walaalkii ku jeestay ayuu yidhi: *“walaal gabadhu waxay u jeedaa degmada ma boqor caadila ayaa ka taliya, mise boqor eexda yaqaan?”*. Markuu intaa maqlay ayaa barbaarkii amakaagu daayay, malaha hoosna iska yiri: *“may marka horeba saas tiraahdo!”*.

Wax yar kadib ayaa barbaartii isha ku dhufteen mayd nacash saaran oo qabuuraha loo wado. gabadhii ayaa mar kale wiilkii ku jeesatay oo tiri: *“tolow qofka lasii wadaa madhintay mise nool yahay??!”* wiilkii ay si wateen ayaa yaab iyo caroba hareeyeen, wuxuuna ku sigtay in afku ka boobo erayo caro xambaarsan!. Kabacalaf ayaa mar kale soo kala dhexgalay, oo inta walaalkii ku jeesta yiri: *“walaal, gabadhu waxay u jeedaa maydkaani waraso maka tegay, mise gablanbuu ahaa!”*

Seddaxdii barbaar ee wada socday waxay soo gaareen goobtii sheekhii wax mehrinaayay joogay. Markii sheekhu warsaday cidda laysu mehrinayana, gabadhii waxay ku adkaysatay in kaba calaf loo mehriyo!!! Wiilkii ay is wateena waaba lasoo marin waayay!! Saa waxy garawsatay in garaad iyo kasmaba kabacalaf ku idilyiin, walaalkiise aan quruxda qiima kale uga hoosayn!!

MURTI IYO MAAHMAAH

Murtidu iyo maahmaahdu waxay bilaan hadalka, waxaana ay xoojiyaan fahmidda dulucdiisa.

Murtidu waa hadal kooban oo farshaxannimo leh, oo xambaarsan kasmoo iyo aqoon run ah oo laga helay waaya-aragnimada.

Maahmaahdu waa hadal kooban oo farshaxannimo leh, oo dhacdo ama muanaasabad ku soo baxa deedna faafay oo dadku jeclaysteen milgaha uu xambaarsanyahay darteed. Maahmaahda waxaa la soo qaataa marka arko dhacdo u eg dhacdadii ay ku soo baxday.

Muddo kadib, waxaa dhacda in maahmaahda kali ahi ku harto maskaxda dadka, lana iloobo dhacdadii maahmaahdu ku soo baxday. Halkaana maahmaahdii kula masawdo murtida.

Maahmaahda waxaa lagu tiriyaa inay tiraab tahay hadana badanaaba astaamihii tixda waxbay ka wadataa. Badanaa maahmaahdu qaafiyad ayay leedahay, qiyaastiina maahmaah kasta markii ay soo baxaysay qaafiyad ayay wadatay, oo ageedsigii badnaa ayay maahmaahaha qaarkood qaafiyadii ku lumiyeen.

Suugaanta Soomaalida

Murtidu, iyadu , tix iyo tiraab labadaba way noqotaa. Waxaa jira murti iyadoo tiraab ah lacuriyay, halka mid kalena ay ahayd bayd ama dhawr bayd oo tix kamid ahaa.

Murti iyo maahmaah kasta qof ayaa curiyay. Hase yeeshee mar kasta oo murtida ama maahmaahda lasheegayo lama raaciyo ciddii curisay. Sidaa darteed muddo dabadeed waaba la iloobaa qofkaas.

1. Adduun ikhatal
2. Afxumo nabadna waa kaa kaxaysaa colaadne wax kaagama tarto
3. Alifkaa xumaadaday al-baqro kaagama hadho
4. Arrad waa dan uskagse waa doqonimo
5. Awrka danbe awrka hore saanqaadkiisa ayuu leeyahay
6. Ajax tag eelna reeb
7. Barasho horteed ha I nicin
8. Booraan hadimo ha godin ku dhici doontidaaba lama ogee
9. Caano daatay dabadood laqabay
10. Canaan ka yaab reer ma doojo
11. Ciirtaa dhammaa, ceebtaada yaqaan
12. Dabaan kuleelkiisa la arag danbaskiisa lagama leexdo
13. Dad ma ceeb la'yahay lama yiraa ee ma cayntaa ayaa layiraa
14. Dan iyo xarago isweyday
15. Dani waa seeto
16. Dhagar qabe dhulkaa u dhaqdhaqaaqa
17. Falaadhi gil gilasho kaa gama hadho
18. Far kali ahi fool ma dhaqdo
19. Gari laba nin kama wada qosliso
20. Gudineey haddaan gobalkay kugu jirin imaadan goyseen
21. Habar fadhida lagdini wax uga fudud
22. Hadal haan mabuuxsho
23. Ilko wada jirbay wax ku gooyaan
24. Intay calooshu buki lahayd cagtu ha bukto
25. Kaadi badane waa loo gogol badiyaa.
26. Laba talaabo dhaxdood bay talo kadhalataa.
27. Labaatan jir intuu geed kaboodo ayuu talo kaboodaa.
28. Luuqluuq maroow laasim laamiyaas ku dhacaa.
29. Maalintaan tabar hayay talo mahaynin, maanta oo talo hayana tabar mahayo.
30. Maan rag waa mudacyo afkood.
31. Maantana farbaan maydhayaaye hay fadhiyo geelu.
32. Marba sidaad u jabtaa loo dhutiya.
33. Marka ceelalyo heshiiso ayay xooluhu biya cabaan.
34. Marti loo qaday in lala qabay moodaa.
35. Meel aadan seexa dooni laguma luloodo.

Suugaanta Soomaalida

36. Meel hoo u baahan hadal wax kama taryo.
37. Miskiin aan dantiisa aqoon mara duug ah horteed ayuu dhamaadaa.
38. Muraadka magaalo kaa gala muraayad baa kaa xigta.
39. Naago badhaadhahooda ayay ka sheekeeyaan ragna ba'ooda.
40. Nacasnimo ninkeedii dishay
41. Nimmaad fadhiga kaga adagtahay looma sara kaco.
42. Nimmaad taqaanid yaa tahay lama yiraahdo
43. Nin aan dhul marini dhaaya maleh.
44. Nin aan hadlin habatiina wax masiiyo.
45. Nin aan kuu furaynini yuusan kuu rarir
46. Nin dayradiisa ayaa lagu dherгаа, ninna dadaalkiisa ayaa lagu qadaa.
47. Nin tuur leh tabuu u seexo waa yaqaan.
48. Qof buka boqol u talisay.
49. Qorigaad jebisay qarjaftiisa lagama naxo.
50. Qosolba hiillimaad leh
51. Rag sedax ka ogow: gacan gudhan,gar weecsan& guddoon jilacsan
52. Rag waa sinaayeen haweenbaase is dhaafshay
53. Raqba waa ku raggeed
54. Sac ninkiisii saynta kaga fadhiyo ma kaco
55. Talo adigga ku nool ee iyadu kuguma noola
56. Talo waa maali aad gara waydo iyo maalin aad gaadhi waydo
57. Waraabe ullala gaari waa erayna wax lagaga dhibi waa
58. Wixii casirkii lagugu arko ayaa ceshihii lagugu caayaa
59. Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan
60. Xoog waa loo xarago la'yahay

SUUGAANTA CARUURTA

Suugaanta caruurtu waa suugaan loogu tala galay caruurta. Kuna haboon da'dooda, garaadkooda, iyo waayo-aragnimadooda noloshaba, marba ay bulshada ay ku dhax noolyihiin iyo casriga ay noolyihiin. Suugaanta caruurtu waaxay ka mid tahay habka ay bulshadu ku barbaariso, kuna kobciso dhaqanka, afka iyo khayaalka ubadka soo koraya. Barbaarinta ka sokow, suugaantani waxay xambaarsantahay maaweelo iyo madadaalo. Curinta suugaantaan caruurta waxaa kawada qayb gala dadka waawayn iyo caruurta.

casrigaan waxaa soo baxay noocyo cusub oo suugaanta caruurta kamid ah, waxaase noocyadii soo jireenka kamid ah:

- 1) Googaalaysi

Suugaanta Soomaalida

- 2) Carabjalqin
- 3) Hees ciyaareedka caruurta
- 4) Heeso maaweeleedka hooyada
- 5) Sheeko xariir

Googaalaysi

Googaalaysigu, ama diinley ama tiiley, waa nooc kamid ah suugaanta caruurta. Waa hadal murtiyeed dahsoon, oo ku aroora sarbeebta, gaaban lehna qaafiyad layskuna halxiraaleeyo. Googaalaysigu waa cayaar faneed ugaar ah barbaarta iyo jiilka soo koraya. Waa hab lagu laylyo garaadka iyo fikradda ubadka soo koraya, madadaalo iyo qosolna wata.

Barbaarta beesha ayaa meel fagaare ah isugu timaada, sida ardaaga oo ay fiidkii kuwada caweeyaan iwm. Wayna dhici kartaa wayni kala qaybgalo. Qofka xujada keenaya ayaa, “Googaa” yiraahda, markaasuu sheegaa hadal mal dahan oo uu ku tilmaamayo waxyaabo deegaanka caan ku ah. Qofka xujada furaya ayaa “Cigale” ama “Cadale” yiraahda, markaasuu sheegaa waxa loo jeedo.

Tusaalooyinka googaalaysiga:

Googaa: xeradayadu waa wada ul oo ul laqaato maleh!

Cadalle: waa geesaha riyaha

Googaa: hal madoobi howd miratay!

Cadalle: waa injirta

Googaa: afar gammuun god kuwada yoomtay!

Cadalle: waa naasaha geela ama lo'da

Googaa: dudun hoosteed duumo kugu legeday!

Cadalle: waa hurdada

Googaa: ul qurxoon qaadan waayay!

Cadalle: waa maska

Googaa: guntin macaan geed lafuulay!

Cadalle: waa nafta

Googaa: wax soo leh, oo sar leh, oo suun leh, oo seedo leh, oo sanuun leh, oo ninna sooryo ku deeqin!

Cadalle: waa majinta

Googaa: colku dilay ciidan mood!

Cadalle: waa qodaxda

Suugaanta Soomaalida

Carab-Jalqin

Carrab jalqintu (Tangue-twisters) waa nooc kamid ah cayaar suugaaneedka caruurta lagu layliyo. Waa erayo ama weedh ay adagtahay in si degdeg ah ama si cad loogu dhawaaqo, badiba waa erayo leh qaafiyad ama codad isu eg, lehna habdhac isku mid ha, lana soo celiyo iyaga oo leh qaafiyaddii iyo habdhacii laakiin ka duwan erayadii hore!

Carab-jalqintu waa inuu qofku erayadaas uu dhowr jeer ku dhawaaqaa si degdeg ah isaga oo iska ilaalinaya inuu khaldo ama ku hakado eray ama ka badan. Carab-jalqintu waa ciyaar-suugaaneed sare loogu qaadayo xirfadda dhawaaqa (Pronunciation Skills) iyo wacyiga luqadeed (Language Awareness) ee ubadka soo koraya. Caraab jalqintu waxay carabka u laylidaa inuu si sahlan ugu dhawaaqi karo erayo adag isaga oo aan khaldeen.

Carab jalqintu waxay kamid tahay suugaan caruureeda caalamiga ah ee dunida daafaheeda ku fidsan. Waxaa la filayaa in luqad kasta ee dunidu leedahay carrab-jalqin.

Caruurta iyo cidda barbaarinaysaab waxay adeegsadaan weedhaha carrab-jalqinta ee soomalida ama deegaannada qaarkood ku caan ah. Sidoo kale, waxay sameystaan weedho cusub oo carrab-jalqin u noqda. Marka ubadka lagu sharibayo carrab-jalqinta waxaa lagu bilaabaa kuwa sahlan, deedna kuwa adag ayaa loo sii gudbaa.

Tusaalayaasha carab jalqinta waxaa kamid ah:

Gorey god gal, god diin gal, diin god gal, god gorey gal!

Nayaa tay garo dhiishii turbado buji, Nayaa turbadu dhiishii tay garo buji

Caanaan cabboo, timir biyo kama daba kaban karo!

Abtigay kol iswad kol I wad

Curad qayd cad qaba!

Shimbir siil gaduud, habartay suul gaduud!

Shimbir dhal cas, habartay dhar cas

Aabe waa qofe, qumbaha gufka saar!

Wanyahow ha iisoo laba lugdambe dhuldhigasho gunshuslayne, reerkaad u soo laba lugdambe dhuldhigasho gundhuslayn katid usoo laba lugdambe dhuldhigasho gundhuslee!

Biciid sarmaan daaqay jilbo baldhaq!

Biciid barqin bilcil daaqay jilbo baldhaq!

Lafta rif oo rid, dameer riman raree wad!

Suugaanta Soomaalida

Dameerkaygiyow ii suntanid iina sumadanid!

Kabtaan kabteedii ee kobtan tiilay, yaa kobtan ka qaadoo kobtaa geeyay!

Waxaan dhahay waan dhahay, waxaanan dhihin ma dhihin, ninkii dhaho waxaan wuu dhahay ii gee anaa dhihi ma dhihin, ha dhaho adaa dhahaye!

Dhamaad...

TUSMADA BUUGA

- 1-** Suugaanta iyo
Qaybaheeda.....
- 2-** Maansooyin Xul
ah.....
- 3-** Dhismaha
Tixdaha.....
- 4-** Qaafiyadda.....
- 5-** Miisaanka tixda.....
Jiifto.....
Gabay.....
Buraambur.....
- 6-** Waaxaha tixda.....
Arar
Duluc
Dhextaal
Gunaanad.....
- 7-** Humaag
- 8-** Af maldahan.....
Sarbeeb.....

Suugaanta Soomaalida

Halxiraale.....

9- Murti iyo

maahmaah.....

10- Suugaanta

caruurta.....